

Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)

Hab-xukunka Degaan ee Habboon iyo Barnaamijka
Tababarka Hoggaamineed

DHISIDDA AWOODDA

URURRADAAN XUKUUMIGA AHAYN IYO KUWA
BULSHADA KU SALAYSAN EE MAARAYNTA IYO
HORUMARITA ILAHA MAALYADEED

QAYBTA 2aad

MAARAYNTA IYO NAQSHADAYNTA
QALABKA TABABARRADA



UN-HABITAT



European Commission

DHISIDA AWOODDA

URURRADA AAN XUKUUMIGA AHAYN
(NGOs)
IYO KUWA BULSHADA
(CBOs)
KU SALAYSAN EE MAARAYNTA
IYO HORUMARITA ILAHA MAALIYADDEED

QAYBTA 2AAD
MAARAYNTA IYO NAQSHADAYNTA
QALABKA TABABARRADA

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

SHAXDA TUSMADA BUUG-HAWLEEDKA

Shaxda Tasmada Buugg	03
Gogol-Dhiga Buugga	05
Aqoonsi	07
Hordhac	08
Jaantusyada Qalabyadda	09
Qalabka 1: Qiimaynta Hababka Iyo Xeerarka Maareyntaada Maaliyadeed	11
Qalabka 1A: Waraaqaha Shaqo Ee Qiimaynta Maareynta Maaliyadda	13
Qalabka 1B: Qorshaha Horumarinta Maareynta maaliyada	21
Qalabka 2A: Qiimayntameelaha Ururkiinu Ku Xooggan Yhay, Hufnaantiisa Iyo Meelaha Wanaajinta U Dihin	25
Qalabka 2B: Soo Jeedin Qodobada Guud Ee Qorshe Ganacsi	35
Qalabka 3: Muhiimnimada Rekoodhada Iyo Warbixinaha Lacageed Iyo Saamayntooda	39
Qalabka 3A: Rikoodhka Maaliyaddu Qiimeysay Wax-Ku-Oolnimada Iyo Warqada Qorsheynta	41
Qalabka 4: Diyaarinta Miisaaniyadda Sannadka	45
Qalabka 4A: Habsocodka Miisaaniyadda Ururkayaga Ee Hadda	47
Qalabka 5: Diyaarinta Habsocodka Kaashka Miisaaniyadda	49
Qalabka 6: Tababar maamulka lacagta	51
Qalabka 6A: Tusaale weydiino daraasadeed	53
Qalabka 7: Maareynta habsocodka hantidhawrida	55
Erey-bixin	57

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

GOGOL-DHIG

Silsiladdan oo ah buug-hawleedyo tababar, oo loogu talagalay, dhismaha awoodda ururrada aan dawliga ahayn, ayaa waxa loogu talagalay in kor loogu qaado maaraynta guud ahaaneed iyo waxtarkooda dhinaca shaqada. silsiladdani waxa ay ku soo hagaagtay dib-u-habaynta iyo kor u qaadista Xarunta Ummadaha Midoobay ee Deegaamada Aadamaha (UNCHS) oo laga dhigay barnaamij dhamaystiran oo isla markiina loo yaqaano barnaamijka Ummadaha Midoobey ee deegaamada kaasi oo isla markiina loo bixiyay UN HABITAT, dib-u-habaynta iyo dib-u-magacaabistana uu ku dhawaaqay Golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobey fadhigoodii 56^{naad} ee bishii Diisambar sannadkii 2001. Ururrada aan dawliga ahayn natiijada ka dhalatay dib-u-abuurista iyo bedelaada lagu sameeyay, hay'adda UN HABITAT ama Hay'adda Deegaanka ee Ummadaha Midoobay, ayaa waxa ay tahay in ay fursad u hesho inay ka caawiso dawladda iyo lammaanayaasha sidii ay u fulin lahaayeen ajendaha ama Barnaamijka UN HABITAT. Barnaamijkaasi oo Golaha loo dhan yahay ee Ummadaha Midoobay uu ku baaqay sannadkii 1996, shir weynihii Istanbul, Turkiga baaqaasi oo Golaha loo dhan yahay uu cusboonaysiiyay shirweynihii loo bixiyay Istaanbul +5 oo qabsoomay bishii June sannadkii 2001. Ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada ku salaysan, ayaa waxa u taala in ay ciyaaraan kaalin muhim ah sidii loo gaadhi lahaa ujeedada kama dambaysta ah ee uu leeyahay barnaamijka UN HABITAT, taasi oo ah in loo helo dhammaan dadka dunida deegaan nolol fiican leh.

Daabacaadda buug-hawleedyadan ayaa waxa kale oo uu ku soo hagaagay awood-dhisida ee hay'adda deegaanka ee UN-HABITAT. Taasina waxa ay tusaalaysaa aqoonsiga aanu aqoonsanahay muhiimadda uu leeyahay dhismaha Awoodda Ururrada, iyada oo noqon karta qalabka loogu hawl galayo sidii loo gaadhi lahaa ujeedada sare ama yoolka hay'addan ee ah in sannadka 2020 lagu sameeyo hagaajin la taaban karo noloshu 100 millyan oo qof oo ku nool deegaamada isku raranta ah, taasina waa sida lagu cadeeyay baaqa kun-sannadeedka ee hay'adda (Millennium Declaration).

Waxa jira cadaymo isa soo taraya oo muujinaya aqoonsi laysku raacsan yahay oo ku saabsan qiyamka qeexidoona barnaamijka magaalooyinka ee kun-sannadeedka cusub. qiyamkaasi waxa ka mid ah ka-qaybgalin (inclusion). bulshooyinka raba inay hoggaanka hore kaga jiraan isbedelka xagga bulshada iyo xagga dhaqaalaha waa inay aqoonsadaan muhiimadda ay leedahay ka-qeybgelintu, laga qaybgeliyo dadka go'aamada sameeya tayada noloshooda iyada oo aan loo eegin hanti, rag ama dumar, da', isir ama diin.

Qiyamkan labaad ee la aqoonsanayaa waa hoggaanka la wadaago kuwaasi oo ka kala imanaya qaybaha kala duduwan ee bulshada iyo hay'adaha. Tan macnaheedu waxa weeye in loo arko ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada ku salaysan qaar waxqaban kara iyo lammaanayaal qiimo leh oo ka qaybgeli kara hoggaanka iyo masuuliyadaha buugg-hawleedyada loo bixiyey dhismaha biriishyada (building bridges), oo ay daabacdo hay'adda UN HABITAT, Waxa loogu talagalay inay la tacaalaan maaraynta loo wada jiro ee hawlaha iyo maaraynta colaadaha iyo khilaafyada kuwaasi oo ay u wadajiraan qabashadooda dadweynaha iyo ururrada aan macaash-raadiska ahayn ee bulshada.

Aqoonsiga saddexaad waxa weeye in kor loo qaado kartida urur-ahaaneed ee ururrada aan

dawliga ahayn iyo ururrada ku salaysan bulshada, kartidaasi oo ah aqoon, xirfado, waayo aragnimo iyo adkaysi, kuwaasi oo marka laysku geeyo adkeeya awoodooda maaraynta maaliyadeed iyo agabkooda aadamiga ah iyo kartida ay u leeyihiin inay ururo kale la xidhiidhaan lana shaqeeyaan. haddaba si ay u

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

noqdaan lammanayaal adag oo waxtar leh, ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada ku salaysan bulshadu waa inay muujiyaan in arrimahooda guduuhu ay nidaamsan yihiin.

Buug hawleedyadan, oo ah silsilad qalab lagu fuliyo waxbarasho waxa iska kaashaday soo saaristooda, hay'addaha UN HABITAT iyo ururka loo yaqaan Partners Romania Foundation for Local Development, taasi oo maalgelinta lagu fulinayayna ay ka timid dawladda Netherlands iyo machadka Open Society Institute. intaasi waxa dheer, dad badan oo kale oo ka qayb qaatay soo saarista silsiladan, waxaana ka mid ah:

1. Kooxo ururrada aan dawliga ahayn (NGOs) iyo ururuada bushlo ku salaysan (CBOs) iyo hoggaamiyeyaal dawladdaha hoose oo ka yimid Afrika koonfurta saxaaraha oo go'aan adagna wata ayaa isku yimid si ay u qeexaan baahidooda dhinaca waxbarashada. Waxana ay kulmeen aqoon is-weydaarsi ay qabanqaabisay hay'adda UN-HABITAT oo ku saabsanaa istaraatejiyada dhismaha awoodda, oo lagu qabtay magaalada Nakuru ee dalka Kiiniya bishii Noofember, 1998, kuwaasi oo qayb firfircoon ka qaatay diyaarinta qoraalkii kama dambaysta ahaa. Kulamadanina waxa ay ku gebogaboodeen aqoon is-weydaarsi ka dhacay magaalada Neyeri ee dalka Kiniya sannadkii 2001.
2. Waxa iyana ka qaybgalay tijaabada qoraalada iyo qalabka tababarka loo diyaarshay shabakad hay'ado ah iyo tababarayaal ah oo ka wakiil ah barnaamijka gobol-ahaaneed ee dhismaha awoodda, isxukunka iyo hoggaaminta maxaliga ee dalalka Yurubta Bari iyo Yurubta Dhexe.

GOGOL-XAADH Ugu dambaystii waxa aan jecelahay in aan u mahadnaqo Mr. Fred Fisher oo qoraaga buug-hawleedkan oo isla markiina ah qoraaga guud ee taxanaha buugaga ah iyo kooxda khubarada oo aad u heer sareeya ee la qoray buugaagta. Waxa kale oo aan mahadnaq u celinayaa kooxda khubarada ah ee uu ka madaxda yahay Tomasz Sudra, kuwaasi oo iyaguna isu geeyay khibradooda si ay u dhamaystiraan qoraaladii qabyada ahaa iyo wax soo saarkii kale. Waxa kale oo iyaguna xusid mudan kooxda Romania ee ka socda ururka (partners Romania Foundation for Local Development) ee ay madaxda ka tahay Ana Vasilache oo iyaguna ka mas'uul ahaa qaabka loo dhiganayo buug-hawleedyada iyo nidaamka loo dejinayo qoraalkooda kama dambaysta ah.

**Anna Kajumulo Tibaijuka
Under Secretary General and
Executive Director
(UN – HABITAT)**

AQOONSI

Tarjumadda iyo habaynta af soomaaliga ah ee “*dhisidda awoodda ururrada aan xukuumiga ahayn(NGOs) iyo kuwa bulshada(CBOs)oo ku salaysan maaraynta iyo horumarita ilaha maaliyadeed*” waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay Komishanka Yurub (EU), isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika iyo Dalalka Carbeed.

Tarjumadda af Soomaaliga ah ee buugan waxa ka hawl-galay Mr. Cabdi Haybe Cilmi. waxa dib u habayn ku sameeyay Mr. Mohamed Farah Warsame (Gafote) oo tifa-tirka ku xeel dheer. Barnaamijka Qaramada Midoobay ee Degsiimaha Aadamaha (UN-HABITAT) laanta Hargeysa ku taal ayaa gacan ka gaysatay hirgelinta hawshan.

Waxa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiga Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamicadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baadhista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumadda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

This manual is part of a series that was published by the UN-HABITAT Training and Capacity Building Branch (TCBB) for ‘capacity building of NGOs and CBOs’ and ‘Building Bridges between local governments and citizens’. As part of the ‘Good Local Governance and Leadership Training Programme (GLTP)’, these manuals were translated into Somali and adapted to the Somali context. The GLTP was funded by the European Commission and implemented by UN-HABITAT under the Regional Office for Africa and Arab States (ROAAS) between July 2003 and June 2005. More information on this project can be found at www.unhabitat.org/roaas.

HORDHAC

Adeegyada soo socda waxa loo naqshadeeyey inay fikrado siiyaan laba heer oo dhegeysteyaal kala duwan ah. Qaybta hore waa afraadda jeclaan doonta inay sameeyaan noocyo kala duwan oo khibrad tababarro ah si ay dadka kale uga caawiyaan sidii ay u baran lahaayeen wax ku saabsan dhisidda awoodda maaraynta khayraadka lacageed. Maareeyayaasha iyo Hor-joojeyaasha Ururro aan Xukuumiga ahayn iyo kuwa Ururro Bulsho ku Salaysan ee doonaya inay sii hagaajiyaan nidaamyada fiditaanka ururradooda iyo wax-qabadyadooda ayaa ah qaybta labaad dhegeysteyaasha loogu tala-galay. Qaybtan labaad waxay haystaan ugu yaraan laba dariiqo. Waxa laga yaabaa inay doonaan inay u maraan layliyada qaarkood keliya si ay ugu shaqeeyaan kordhinta aqoonta iyo xirfadahooda ku wajahan meelo ay gaar u danaynayaan ama khuseeya. Amaba waxa laga yaabaa inay u adeegsadaan layli koox maarayneed si ay u dhaliyaan fikir iyo wax qabad ku saabsan siday hadda u maareeyaan cilaqaad-yada muhiimka ah ee ka baxsan xuduudaha ururkooda.

HORDHAC

Waxaanay idinku dhiirri-gelinaynaa inaad adeegyadan u isticmaashaan dariiqo kasta oo ay u noqonayaan wax-ku-ool inay daboolaan baahidaada qof ahaaneed, baahiyaha tababarteyaashiinna, ama kuwa ururkiinna. Ha ka walaacin inaad wax abuure ku noqoto dabbaqiddaada. Haddii ay tahay door jile ahaaneed, laga yaabaa inaad doontid inaad dib u min-guurisid si ay si habboon u muujin karaan sawirka xaaladdiinna dhabta ah. Haddii ay tahay hab-socodka qorshayn hawleed, beddeli si ay u waafaqdo baahiyaha khaaska ah ee ka qayb-galeyaashiinna. Haddii ay yihiin tilmaamuhu wax aad u adag, waa ducfi dhuuxa kaga jira kuwii curiya buug hawleedyadan, ka dhiga wax fudud ama dib ugu naqshadeeya iyaga hab ay idiin anfici karaan idinka iyo dhegeysteyaashiinna.

JAANTUSYADA QALABYADDA

Waxaanu halkan kuugu soo gudbinaynaa fikrad ama laba ku saabsan qaabka ama jaantus aanu u isticmaalay dhisidda qalabyada. Waxaanu u haysanaa dadka buuggan isticmaali doona intooda badani in ay leeyihiin waayo-aragnimo tababare. Sidaas darteed baa sharaxu uga gaaban yahay sharaxa tilmaamayaasha kale ee la mida. **Ujeedooyinka tababarka** waxannu u bixinay **ujeedooyin waxbarasho**, taas oo la odhan karo waa doorasho qof ahaaneed.

Waxa intaa dheer in siyaabo ka duwan sidii lagu soo baray loo qori karo, ama si aad dhab ahaan u qorto markaad hindisayso tababar. Siday arrintu noogu muuqato; waxaanu kugu dhiiri gelinaynaa; inaad weedhaha ujeedooyinka u qorto sida ugu wanaagsan ee ay adiga iyo ka-qaybgalayaasha. Habraaca aannu adeegsanay waa midka aanu isnidhi wuxuu si maangal ah ee lagu fulin karo kalfadhi tababar; haddii aan si kale u dhigno, waa in aqoonta la kordhiyaa; la hagaajiyaa xirfadaha; la beddelaa maan-hagga; ama ay natiijooyinku noqdaan kuwa falgashan; taasoo ah horumarinta qorshe hawleed. Waqtiyada aannu cayinay waa male-malayn uun. Ugu dambayn qaybana habraacu waxay tilmaamayaan sida aad u adeegasan karto qalabka si aad u gaadho ujeedooyinkaaga barasho. Erey kale oo taxadirkiisa lehi waa markaad gudagasho sanduuqa qalad ka (Tool box). Waxa suurtagal ah sida loo soo qadimay qalabka in aanay u kala hormeyn sidaad doonayso inaad u isticmaasho markaad aqoon isweydaarsi hindisayso. Matalan qalabyada 1aad iyo 2aad ee aan hore u sheegnay waxa marka horeba loo hindisay qalab maareyn ; mar labaadkana agab lagu isticmaalo aqoon isweydaarsiyada. Haddana waxaanu hordhac uga dhignay mid kastoo qalab kaas ka mid ah fikrado hindise.

Sidaan hore u sheegnay , waxaanu jecel nahay inaannu ka hawlgalkayaga agabkan inaad u aragto inaad ku jirto safar aad wax aan hore loo aqoon aad ka heli karto. Tan micnaheeda waa inaad ka baydho wadada aannu jeexnay oo aad hesho wadiiqooyin .Marar ka qaar koodna waxa dhici karta inaad doonto inaad qalabyada u isticmaasho inaad dhisto waddo aad leedahay .Waxkasta oo aad qorshayso inaad qabato waxaa aannu kuu rajaynaynaa oo safar aqooneed oo ku xiise geliya.



Qalabyada koowaad iyo labaad waxay ugu horeyn ku wajahan yihiin maareeyayaasha, marka ku xigtana tababarayaashu inay isticmaalaan markay la shaqaynayaan maareeyayasha NGO iyo CBO. Tan ujeedadeedu maaha in lagula horjoogsanayo tababarayaashu inay u adeegsadaan la shaqaynta beesha NGO ee ka kooban ururro, ee waa inaannu mar labaad ku adkayno liishaanka la saaray qalabyadan.

Laga bilaabo qalabka 3aad isbeddel baa dhici doono. Qalabyada inta hadhay waxay ku wajahan yihiin tababarayaasha waxaanna la doonayaa in lagu isticmaalo deegaan waxbarasho oo qaabaysan ; sida aqoonisweydaarisyo iyo dood kooxeedyo. Hase ahaatee, haddii aad tahay maareeye NGO ama CBO ,qalabyadani waa la isticmaali karaa. Waxaanu kugu dhiirgelinaynaa inaad u isticmaasho hawlaha waxbarasho ee aad hogaaminayso oo aad ka fekerto sidaad ugu isticmaali lahayd adigoo fursado horumarineed siinaya shaqaalahaaga iyo guddidaada la-talinta.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

QALABKA 1: QIIMAYNTA HABABKA IYO XEERARKA MAAREYNTAADA MAALIYADEED

Qalabkani waxa loo hindisay inuu maareeyayaasha iyo dadka kaleba ka caawiyo siday u hirgelin lahaayeen hubin dhamaystiran oo ay ku sameeyaan habkooda lacageed iyo xeerarkooda hawl-gal. Haddaad mar uun daawatay duuliyaha dayuuraddi sida uu u hubiyo dayuuradda duulimaadka ka hor, waxaad jeclaysan lahayd sida uu u dhamaystiran yahay liiskiisa hubintu. Hubintaasi waxay ka kooban tahay mid ka badan boqol su'aaloodoo kala duwan, oo qaar badani aanay ka mid noqnaynin kuwa loo adeegsan karo ururkaagga. Inkastoo qodobadda liiskiisa hubinta aanay xidhiidh la lahayn habraacaaga maaliyadeed ee waqtigan la joogo, haddana, waxay ku siin karaan guud mar heer sare ah oo aad mustaqbalka u baahan doonto marka uu ururkaagu koro ama uu qaado mas'uuliyaddo lacageed oo badata.



Liisaska hubintu wanaagoodu waxa uu la mid yahay hawl-galada oo ay dardar geliyaan. Haddaynu tixraacno duuliyihii iyo liiskii hubinta ee duulimaadka ka hor, ma qoraan uune laakiin inta badan dhaliisha ay arkaan wey hagaajiyaan intaanay dayuuraddu haadin. Halka ay qiimayntaada habka maaliyadeed lamid ahayn xaalada deg dega ah "Haddii aan dhaliisha la hagaajin, ma duulayno"; ma aha waxaan caaddi ahayn in NGOs ama CBOs ay la kulmaan khasaare maaliyadeed markay iska indho tiraan mabaadii'da iyo xeerarka hufan iyo xilqaadnimada maareynta maaliyad sannadeedka. In kastoo uu qalabkan ay bartilmaameedkiisu yahay maareeyaha, micnuhu maaha inuu isticmaalkiisa layli tababarku uu ka reeban yahay. Dadka doonaya Inay ku isticmaalaan goob tababar, waxaannu ku dhiiri gelinaynaa inay raadsadaan qof waayo-arag ah oo ku takhasusay maaliyadda inuu kaa caawiyo, haddii aanad adigu takhasuskaas leedahay mooyiye. Ururka shaqaalihiiisa waayo-aragnimo iyo takhasus maaliyadeed lahayn, si weyn bey ugu adkaanaysaa inuu goob tababar ku isticmaalo. Haddaad go'aansatay inaad qalabkan ku isticmaasho tababaradaada, tixgeli fikradaha soo socda.

Ujeedo waxbarasho waa:

In aad kordhiso aqoonta ay ka-qayb-galayaashu u leeyihiin hababka, xeerarka iyo xirfadaha maaliyadeed ee ay ku qiimayn karaan habka wax qabad ee ururka.

Ka-qayb-galayaal waa:

Haddii uu qorsha aad ka-qayb-galayaasha u hayso inay si dhab ah uqiimeeyaan hababka iyosharciyada maaliyadeed ee ururkooda; oo aanu anaguna talaabadaas u riyaano, waxa laga yaabaa inaad ku soo kaabto maareeyayaasha doonaya inayka doodaan siday maaliyad ahaan uga hawl-geli lahaayeen kuwo kale jiritaanka doonistaasi, waxay noqon kartaa waayo-aragnimo qiimo leh mar haddii mid waliba kan kale la wadaagayo tijaabooyinka iyo meelaha wanaajinta u baahan.

HAB SOCODKA

Hawsha Aqoon is weydaarsiga ka hor:

QALABKA 1: QIIMAYNTA HABABKA IYO XEERARKA MAAREYNTAADA MAALIYADDEED

QALABKA1: QIIMAYNTA HABABKA IYO XEERARKA MAAREYNTAADA MAALIYADDEED

Ka-qayb-gale kasta ka codso inuu aqoon isweydaarsiga keeno dhamaan siyaasadaha maareynta maaliyada, xeerarka iyo foomamka hadda uu ururku isticmaalo, kuwaas oo uu la socdo nuqul (copy) miisaaniyadii u dambaysay ah. Ku dar awaamiirtaada aqoon isweydaarsiga ka hor inaad ku

wargeliso inay agabkan u isticmaali doonaan qiimaynta maareynta maaliyada ururkooda ayna la wadaagi doonaan ka-qayb-galayaasha kale.

Soo Jeedin Qaabaynta Aqoon Isweydaarsi.

1. Isbarashada ka dib, ujeedooyinka aqoon isweydaarsiga, waa inaad haysataa khabiir xaga maareynta maaliyada ah iyadoo ay doorbidan tahay mid ka socda NGO dhinacaas ka guulestay si uu u hago dood ku koobta dhamaan qaybaha muhiimka ah ee su'aalaha ku tilmaaman Qalabka qiimeynta. Doodu waxay wax-ku-ool noqonaysaa haddii lagu tusaaleeyo sawir weyn oo ay ku muujisan tahay sida ay qaybaha kala duwani isugu xidhan yihiin. Sawirka waxa la samaynkaraa iyadoo ay doodu socoto taas oo ay ka qayb-galayaan ka-qayb-galayaasha oo dhami.
2. Ku xigsii doodaan qaybinta nuqulo (copies) qalabka qiimaynta dabadeedna qof u sheeg inuu dhammeeyo. Ururrada qaarkood haddii qof wax ka badani ay ka yimaadeen koox ahaan ha u shaqeeyaan. Ku dhiiri gali kuwa su'aalo ka qabad wax kastoo qalabka la xidhiidh inay xan-shashaq ku weydiisto caawin. Qaybta isqiimaynta qof ahaaneed waa in ay ku dhamaataa 30 ilaa 45 daqiiqo.
3. Kulmi ka-qayb-galayaasha si ay uga doodaan falcelintooda ku saabsan layliga iyo qaybta ay dhibaataada u weyn kala kulmeen hadday tahay xagga fahamka su'aalaha ama go'aaminta in waxay qabanayaan uu yahay mid haboon.
4. Ka codso ka-qayb-galayaasha in qof waliba ka mid noqdo koox 2 ilaa 3 qof ah uu isagu doorto inuu ka-qayb-gale kasta oo koox ka mid ah u sheeg inuu dhameystiro qorshe hawleed ku saabsan siyaabaha loo wanaajin karo hababka iyo sharciyada maaliyada ururkooda iyo siday natiijada ula wadaagi lahaayeen xubnaha kale ee kooxda. Muraadka laga leeyahay waa in ka-qayb-galayaasha la siiyo fursaday caawimo dhexdooda kaga helaan sida ay u dhamaynayaan qorshooda.
5. Aqoon-is-weydaarsiga ku soo gebogabee ka-qayb-galayaasha oo soo tebiya qaar ka mid ah isbedeladda u muhiimsan ee ay doonayaan inay ku sameeyaan qorshaha hababka maareynta maaliyadda ururkooda markay soo guryo noqdaan.

QALABKA1: QIIMAYNTA HABABKA IYO XEERARKA MAAREYNTAADA MAALIYADDEED

QALABKA 1A: WARAAQAHA SHAQO EE QIIMAYNTA MAAREYNTA MAALIYADDA

Waraaqahan shaqo waxay weydiinayaan su'aalo is-dabajoog ah oo ku saabsan NGO aad maamusho habkeeda maareynta iyo xeerarka maaliyada, kuwaas oo la mid ah waxa ku yaal buugga koowaad ee ahtilmaam hagan. Waxa loo hindisay inuu kaa caawiyo sidaad u hirgelinlahayd safar gacan ka qabosha oo aad ku soo marto dhinac waloo NGO maareynteeda maaliyadeed iyo sidaad u go'aansan lahayd noocyada hawlgaladda aad u baahan tahay inaad qaado si aad uhaggaajiso hawlgelintaada guudee habka iyo shuruucda gaar ah. Waxa jiri kara in weydiinaha

**QALABKA 1A: WARAAQAHA
SHAQO EE QIIMAYNTA
MAAREYNTA MAALIYADDA**

qaarkood aanay noqon kuwo ku haboon baahiyaha ururkaaga. Xaaladahaas oo kale, waxaanu kugula talinlahayn inaad weydiinta sidaas oo kale ah ka boodo oo ta ku xigta ka jawaabto. Marka ay weydiinuhu dhamaadaan, waa inaad habkaaga maaliyadeed sawir dhamaystiran iyo fikrado la xidhiidha sidaad kuwaas u sii hagaajin lahayd ka haysataa; adigoo ku salaynaya qiyamka maareynta maaliyada ee la aqoonsan yahay.

XOG-DHAWRIDDA WARBIKINTA MAALIYADDEED

LEDGER GUUD (Joornaalka)

**QALABKA 1A: WARAAQAHA
 SHAQO EE QIIMAYNTA
 MAAREYNTA MAALIYADDA**

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Ma yahay ledger isku dheelitiran oo lagu xafido fund kasta si waafaqsan halbeegyada guud ee xisaabka iyo hantidhawrka?			
Ma jiraa qaa'imad xisaabtan oo qoraal ihi?			
Foomka gelinta joornaalka oo qoraal ah ma loo diyaariyey wax kasta oo la gelinayo ledgerka?			
Sarkaal masuul ahi ma ansixiyaa wax kasta oo la gelinayo ledgerka intaan la gelin ka hor?			
Ma jirtaa hantidhawr haboon oo raadkiisa la raaci karo laga bilaabo ledgerka ilaa ilaha dhukumentiga?			
Ka nabadgelinta ledgerka dab, tuuggo iyo waxyaalaha la midka ahi ma jiraan?			
Fundiska oo dhama ma u xisaabsan yihiin si waafaqsan? :			
<input type="checkbox"/> Halbeegyada xisaabtanka iyo hantidhawrida ee guud ahaan la aqoonsan yahay?			
<input type="checkbox"/> Sharciyada deegaanka iyo kuwa qaranba?			
<input type="checkbox"/> Shuruudaha hay'adda maalgelinta?			
Xisaabta socota ma loo agaasimaa si waafaqsan			
Sharciyada haboon ee dawladda, deeqda, qandaraaska iwm?			
Ma la geliyaa xogta miisaaniyadda ledgerka guud?			
Ledgeradda guud dhamaantood ma la hantidhawraa sanadkiiba?			

WARBIXINAHA

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Warbixina bileedyadu ma ka tarjumayaan Kharashyada dhabta ah ee barnaamijyada kala duwan?			
Warbixinaha ma la soo gudbiyey waqtigii la rabay?			
Warbixinuhu ma dhab u sugan yihiin?			
Warbixinuhu faa'iido ma leeyihiin micnase may leeyihiin?			
Warbixinuhu si sugan ma u tilmaamayaan halka uu barnaamij kasta marayo dhinaca miisaaniyadda?			
Haddii barnaamijkaagu helo qandaraas ama deeq, ma samaysaa warbixino xiliyeed gaar ah xaaladda uu qandaraas ama deeq kastaa marayso?			

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

MAAMULKA MAALIYADDA

Biilasha adeegyada

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Biilasha waqtiga ugu haboon ma lagu Diyaariyaa?			
Biilasha si dhab ah oo sugan ma loo diyaariyaa?			
Habka xisaabinta ma ka dhashaa ledger hoosaad deynta la filayo inay ka soo hoyata qof kasta oo macmiil ah?			
Ma jiraan waxyaalo sugan oo dadka macmiisha ah lagu suggaya in biilashooda loo dirayo?			
Haddii isku celceliska tirada macaamiishu bishii ay ka badan yihiin 500 ma jiraa liis magacyada iyo cinwaanka macaamiisha muujinayaa?			

BIXINTA

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Biilasha mudadii u go'nayd ma lagu bixiyaa?			
Qaladyo ma ka dhacaan habka diyaarinta biilasha sida qadarka lacagta ama lambarka xisaabta lagu qayiday?			
Xeerarka xisaabintu ma u samaysan yahay si suurtagelinaysa xalinta dhibaatooyin gaar ahaneed?			

FOOJARKA MUSHAAROYINKA

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Jeegaga mushaharka waqtigoodii ma lagu bixiyaa?			
Qaladyo ma ku yimaadaan mushaharka shaqaalaha ama waxyaalaha laga gooyo?			
Qalabka iyo alaabadu ma ka xafidan tahay tuugo iyo kutagri fal?			
Alaabada debedda taal aad ma la yareeyaa?			
Ma jiraan Alaabooyin gaar ah oo tiradoodu si xad dhaaf ah u badan tahay?			
Ma xog-dhawran tahay alaabta hadda taalaa?			
Alaabada iyo qalabka muddo marka laga joogoba ma la tiriyaa, oo dib-u habeyn malagu sameeyaa buugga iyo meelaha kale wax lagu xafido?			
Hab lagu kantaroolo qalabka iyo alaabada oo maangal ah ma jiraa?			
Ma jiraa hab maareyn sugan oo lagaga war heli dhinacyda:?			
<input type="checkbox"/> Xaaladda hantida ururka			
<input type="checkbox"/> Lacagta ka soo baxda iibka?			
<input type="checkbox"/> Qiimaha hantida			
<input type="checkbox"/> Hantida baaba' ah			

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

RASIIDHADA LACAGTA CADDAANKA AH

**QALABKA 1A: WARAAQAHA
SHAQO EE QIIMAYNTA
MAAREYNTA MAALIYADDA**

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Ma jiraan siyaasado iyo habraacyo qoran oo loo adeegsado rasiidhada lacagta kaashka ah?			
Haddii lacagta kaashka ah uu qabto qof aan ahayn lacag hayaha ma jiraan talaabooyin lagu hubiyaa in lacagtaasi sidaas loo ururiyey oo dhami ay gaadho lacag hayaha?			
Naadir ma tahay in shey gaar ahi uu si xad dhaaf ah uu u yaal?			
Ma jiraan hawlgal haboon oo laga qaaday in lagu ururiyo deymo muddo dhaaf ah?			
Habka lacagta la qabtaa ma waafaqsan yahay sharciyada dawladda?			
Ma jiraan habraacyo haboon oo uu qofku biilka ku bixin karo daaqada lacag-hayaha, oo ay ka mid yihiin rasiidhada foomamka kaashka ee la lambariyey?			
Ma dhacdaa in marka muddo la joogoba la is waafajiyo xisabaadka ledgerka guud iyo ledgerada ka farcama?			
Ma jiraa hab wax-ku-ool ah oo lagu sugi karo rasiidhka kaashka ah ee laqabtey?			
Ma jiraa qoraal tilmaamaya mas'uuliyadda ururinta kaashka?			
Ma jiraa qof fura waraaqaha oon ahayn lacag-hayaha iyo xog-dhawraha?			
Ma diyaariyaa qofka fura waraaqaha xogta lacagta iyo jeegagga la qabto?			
Haday haa tahay, xogta ma loo dhiibaa qof aan ahayn lacag-hayaha oosi madax banaan u hubiya wadarta la xog-dhawray?			
Si joogto ah xogta maloo barbar dhigaa buugga kaashka lagu qoro?			
Ma jiraa rajister ama qalab kale oo kaashka lagu keydiyaa?			
Hadday taasi jirto, wadarta mishiinadda si madax banaan ma u hubiyaa xisaabiyaha barnaamijku?			
Ma buugaagta iibka ama rasiidho aya la isticmaalaa?			
Xaashiyaha iyo rasiidhada hore ma loo lambariyey?			
Wadar maalmeedda iyo tirsiga susunka ah si madax banaan ma u eegay xisaabiyaha barnaamijku?			
Buugaagta rasiidhada ee aan la isticmaalin ma la sugga badbaadintoda?			
Haddii aanay siyaabahani jirin (buugga kaashka iyo mid rasiidh toona) ma waxa jira hab kale oo haboon oo loo adeegsado kantooroolida arrimahaas?			
Maalin walba rasiidhada la qabto isla maalintaasba ma lagu shubaa Baanka?			
Ma qof aan ahayn lacag-hayaha iyo keyd-hayaha ayaa lacagta Baanka ku shuba?			
Shaqaale aan ka socon lacag-hayaha barnaamijka wax ma gelinkaraa ledgerka guud?			

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Habsocodka caadigga ah ee xafiisku ma yahay mid diidan in lacag-hayuhu xoriyad u helo ledgers xisaabaha soo hoyanaya iyo warbixino bileedyada?			
Sida ugu haboon ma loo kontoroolaa kirooyinka, dulsaarka, saamiyada macaashka, iyo dakhliyada la mida si haddii aanay rasiidh lahayn markiiba baadhis lagu samayn karo?			
Lacag-hayuhu masuul ma ka yahay rasiidhada kaashka ah laga bilaabo marka la keeno ilaa inta Baanka loo dirayo?			
Ma jirtaa si sugan oo lagu badbaadiyaa lacagta kaashka ah iyo dhaqdhaqaaqeeda; sida khasnad bir ah iwm			

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

SOO IIBSASHADA

**QALABKA 1A: WARAAQAHA
 SHAQO EE QIIMAYNTA
 MAAREYNTA MAALIYADDA**

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Dalabka alaabta la soo iibsano dhakhso ma loo diyaariyaa?			
Shaqaalaha u xilsaarani soo iibsashada inta badan ma sugaan macdaarada ugu qiima jaban uguna macaamil wanaagsan?			
Shaqaalaha u xilsaaran soo iibsashada ma muujiyeen dhaqaalayn iyo kayd oo ay sababtey habraacyada iibsashadu?			
Ma jiraan liis shaqaale rasmi ah, oo la siiyey awoodda ansixinta dalabyada?			
Alaabada waaweyn ee la soo iibsaday ma leedahay timaamo sugan oo sooc ah?			
Marka ay suuragal tahay, alaabta in jumlada lagu soo iibsadaa ma jaban tahay hadii tafaariiq lagaga soo iibsan lahaa?			
Ma la qiimeeyaa wax-qabadka iibsashaha marka muddo dhamaatoba?			
Ma jiraa qoraal rasmi ah oo ku saabsan dalabyada alaabta la soo iibsano oo koobiyo la kala siiyo xisaabtan, iibiyaha, iyo qofka guddooma?			
Dalabyada ma la socdaan xogaha muhiimka ah oo dhama, oo ay ka mid yihiin:			
<input type="checkbox"/> Tilmaamid dhamaystiran?			
<input type="checkbox"/> Halbeega cabiraad?			
<input type="checkbox"/> Dhamaan unugyada sicir goynta?			
<input type="checkbox"/> Gaadiidka Keenidda oo bilaash ah?			
<input type="checkbox"/> Huruudaha Keenidda alaabta?			
Ma jirtaa siyaasad soo iibsashada oo xaddaynaysa qiimaha dalab kasta lacagtiisu inta ay tahay?			
Foomamka dalabyada ma lambaransan yihiin. oo ma la kontoroolaa?			
Tartan qandaraas ma la geliyaa alaabta qaarkeed?			
Ma jiraa habraac lagu qiimeeyo alaabada qaakeed?			
Ma jiraa hab haboon oo lagu diiwaan geliyo laguna hubiyo marka la keeno alaab aan dhamaystirnayn?			
Qof masuul ahi ma ansixiyaa waraaqaha lacag bixinta?			
Ma jiraa xil qeexid la hubiyo rasiidhada oo ku saabsan sicika iyo shuruudaha? kordhyada? Qiimaha gaadiidka?			
Qof masuul ahi ma naqtiimaa dalabyada alaabta si uu hubiyo inay waafaqsan yihiin miisaaniyada?			
Ma jiraa hab keydinta faylalka dalabyada furan oo lagu xaqiijiyo kuwa muddo dhaafka ah?			
Dalabyada waaweyni shuruud ma tahay in qiimayaal kala duwan la raadiyo?			

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

KANTAROLIDA HANTIDA IYO MAAREYNTA

**QIIMAYNTA
MAAREYNTA
MAALIYADDA**

	Haa	Maya	Hawlgal ayaa loo baahan yahay
Ma jiraa fayl hantida oo sugan oo lagu diiwaangeliyo hantida maguurtyada?			
Faylka diiwaangelinta hantidu ma muujiya: <input type="checkbox"/> Taariikhdiisii la yeeshay goorta la iibshay? <input type="checkbox"/> Astaamo haboon oo lagu tilmaamo hantida ?			
<input type="checkbox"/> Iibiye ama macdaarle? <input type="checkbox"/> Goobta iyo beddelidda goobta? <input type="checkbox"/> Sicerka iibsashada?			
<input type="checkbox"/> Lambarka hantida? <input type="checkbox"/> Inta lagu qiyaasay noloshiisa?			
<input type="checkbox"/> Mudaynta dayactirka ka-hortagidda? <input type="checkbox"/> Waqti sugan iyo qiimaha alaabta dayactirka?			
Ma jiraa habraac rasmi ah oo iswaafajin kara tirinta iyo diiwaanka hantida? Ma jiraan calaamado ka lusha oo lagu timaami karo qaybo ka mid ah hantida sida miisas, kuraas iyo wax la mid ahi?			
Ma jiraan Faylal haboon oo lagu xafido lahaanshaha hantidda? Si haboon hantidu ma caymisan tahay?			
Faylka keydinta hantida marka muddo la joogoba ma la waafijiyaa ledgerka guud?			
Ma jiraa habraac wax-ku-ool ah oo hantida gabowday lagaga saaro xog-dhawryada, lacagta xaraashkiisa ka soo hoyatana lagu xisaabiyo?			
Ma jiraa shaqaale si rasmiya masuuliyada hubinta dayactirka qaybaha waaweyn ee hantida loo xilsaaray?			
Si waafaqsan go'aanada iyo shuruudaha wershedlaha xogta ma loo keydiyaa?			

Ayadoo ku salaysan daraasada ururkiina ee habka maaliyadiina iyo nidaamyadiina, waxaanu kuu soo jeedinaynaa inaad la fadhiisato shaqaalahaaga oo soo saara qorshe aad ku dhawraysaan kuwa badan oo si khatara u yar yar oo aad uga wax bixiso sidii hawlo loobaahan yahay in la qabto. Qaabkan boggagan ee soo socda ayaa loo sameeyay si lagaaga caawiyo is aad isugu habayso malayaashaada.

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

QALABKA (1B): QORSHAHA HORUMARINTA MAAREYNTA MAALIYADA

Adigoo ka shidaal qaadanaya qiimaynta hababka iyo sharciyada maaliyada Ururkaagga, kulan aad ku dejinaysaan qorshe aad wax kaga qabataan dhaliilaha ugu daran ee aad ku muujisay “hawlaho loo baahan yahay”, la yeelo fadhi shaqaalahaagga. Qaabka ku yaala buugagga soo socda waxa loo hindisay inuu kaa caawiyo lsku dubariddada fikradaha aad ku diyaarinaysaan qorshe hawleed wax-ku-ool ah. Ku bilaw inaad dib-u-eegtaan natiijooyinkii qiimaynta iyo hawlaha aad muujiseen inaad u baahan tihiin. Waxaanu soo jeedinaynaa inaad ku soo ururrisaan hawlaha aad tilmaamteen warqad cad oo weyn si ay idiinku fududaato aragtaana iyagoo dhan. Markaad u qortaan qaybaha ay ugu taxan yihiin foomka qiimeynta, Waxa laga yaabaa inay doontaan inaad dib-u-haybayn hawlaha ku samaysaan; haddii ay tani waxtar weyn idin siinayso dhinaca dejinta qorshe hawleedka.

Sheeg saddexda ama afarta hawlood ee ugu muhiimsan ee aad u baahan tahay inaad qaado waqtigan aynu joogno, adigoo ku salaynaya xogta qiimaynta si hababka iyo sharciyada maareynta maaliyada aad uga sii wanaajiso siday hadda yihiin oo ay u noqodaan kuwo wax-ku-ool ah. Haddii aanad hubin micnaha labada erey eeg cutubka 1aad, qaybtiisa koowaad ee Buugan.

**QALABKA (1B): QORSHAHA
HORUMARINTA
MAAREYNTA MAALIYADA**

- a. -----
- b. -----
- c. -----

Falgal kastoo kuwan ka mid ah, buuxi talaabooyinka qorshe hawleedka. Waxaad u baahan doontaa hawlgal kasta oo aad qorsheyesay dhawr talaabo inaad qaado.

Hawlgalka aad qaadayso:

- 1. Qor odhaah ujeedo oo sheegaysa waxaad doonayso inaad gaadho markaad hawlgal qaado. Odhaadani waa natiijada filashadaada.**

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

2. Yaa qaadaya masuuliyada koowaad si loo gaadho ujeedada?

**QALABKA (1B): QORSHAHA
HORUMARINTA
MAAREYNTA MAALIYADA**

3. Yaa kale ee doonaya inuu ka hawlgalo?

4. Talaabooyinka gaar ahaaneed ee la qaadayaa waa kuwee, si loo gaadho ujeedadii?

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

5. Hawl kasta waxaad qodobaysaa inta maalmood ama saacadood ee qof shaqada ku dhamaynayo iyo mudada ugu yare ee la aqbali karo inay shaqado ku dhamaato. Adeegso qaabka hoose ama mid aad leedahay samayso.

Hawsha inay dhamaato La doonayo	Wagtiga loo baahan yahay	Taariikhda u dambasa ee la aqbali karo

6. Tax qalabka gaarka ah iyo agabka kale ee loo baahan yahay in lagu dhamaystiro hawsha.

7. Su'aasha soo soctaa waa mid laga jawaabo ay tahay marka laga hadlayo qorshe hawleedka dhamaantii. Sidey u qiimaynaysaa natiijooyinka qorshe hawleed kan?

Qaababkan qorshaha hawlgalka waxa lagu siiyey tusaale inuu kuu noqdo si aad u garato waxyaalaha aad u baahan tahay inaad qorshaha geliso. Xor waxaad u tahay inaad sidiisa u qaadato iyo inaad wax ka bedesho si ay ugu haboonaato baahiyahaaga maarta. Xusuusnaw: Qorshe hawleed wuxuu sheegaa waxa loo baahan yahay in la qabto, oo uu qabanayo kuma? oo kaashanaya kuma? oo dhamanaya goorma? Iyo sidaad ku ogaanayso inaad ku guuleystay gaadhista natiijadii ama ujeedadii la filanayey? Marka faafaahinta qorshe hawleedkaagu sii badatoba, dhiirigelin dheeraad ah ayaad heleysaa inaad fulin karto. Tan micnaheedu maaha inaanu ku leenahay wax ha ka beddelin qorshaha mar hadaad hirgelintiisaa ku guda jirto. Laakiin ku bilaw qorshe hawleed cad.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

QALABKA (2A): QIIMAYNTA MEELAHA URURKIINU KU XOOGGAN YAHAY, HUFNAANTIISA IYO MEELAHA WANAAJINTA U DIHIN

Sii jiritaanka ururkaaga iyo barnaamijyadiisuba xaga maaliyadeed. waa qayb ka mida carinta inaad guulaysato, in kastoo aanu nahay kuwa ugu horeeya ee qira inay tahay arin lagama maan ah. Waxa guusha maaliyadeed la xidhiidha, xooganaanta ururka iyo hufnaantiisa. Murtidu waa in labadaas isku xidhani ay yihiin kuwa go'aamiya sidaad ugu guulaysan doonto in lagu aqoonsan karo hayad qiimo u leh bulshada iyo awooda inay sii socdaan tabarucaadkii ay bulshada u fidinaysay.

Xooganaanta NGO/CBO iyo inuu noqdo mid hufan waxay koobtaa waxyaabooyin dhawr ah. Matalan: Ma daboolaysaa baahi muhiim u ah bulshadaada iyo dalkaaga? Baahidaas ma u daboolaysaa si la mida ama ka fiican kuwa kale ee ku hawlan u adeegida bulshadaas? Ururkaaggu may yahay mid had iyo jeer ku dedaalaya inuu kor u qaado wax-ku-oolnimada barnaamijyadiisa iyo waxqabadnimada hawlgalnimadiisa?

Dhawr siyaabood ayaa jira oo uu urur isu qiimayn karo. Sixir waxba kuma laha su'aalaha aad u baahan tahay inaad naftaadda weydiiso markaad qiimaynayso kaa tahay iyo sida waxqabadkaagu yahay. Si aad u bilowdo, waxaannu ku darnay su'aalo dhawra oo inta badan lala xidhiidhiyo qiimaynta ururrada qidaaca gaarka ah markay ku hawlan yihiin isku day Dejinta qorshe ganacsi. Haddii aad hore ugu hawlanaan jirtay diyaarinta

Qorshayaal istraatijig ah ee ururkiina ama bulshada su'aaluhu kuwo kugu cusub maaha. Qorshayaasha ganacsi iyo qorshayaal istaraatijiga ahi waa ereyo loo isticmaalo habsocodka fikirka hor-u-socodka ah ee loo adeegsado goobaha kala duwan.

Ha ka waaban in su'aalaha aan soo jeedinay aad ku bedesho kuwaaga, ama Wax ku darto ama xata aad qaarka aanad doonayn ka saarto. Runtii qorshe hawleedka ka soo bixi doonaa isqiimaynta ururkiinu waa mid aad idinku leedihiin.

Haddaynu ka hadalno qorshayaal ganacsi, dhamaadka su'aalaha waxa ku qoran qaab soo jeedin ah sida loo qoro qorshe ganacsi. Ujeedada laga leeyahay waa in lagu dhiiri geliyo inaad jawaabaha aad su'aalaha ka bixiso oo dib isugu shaandhayso si ay u noqdaan qorshe ganacsi. Waayo? Sababta ugu weyni waa iyadoo hayadaha maalgelintu ay jecel yihiin inay arkaan qorshe ganacsi intaanay taageero siin NGO. Waa hab kale oo ay ku Xaqiijiyaan in ururkaagu si fiican loo maareeyo. Qaabka aanu soo jeedinay iyo wixii kale ee aad ku dartaa qorshaaga ganacsi maaha mid muqadasa. Labada waxay u bedeli kartaa si ay u waafaqaan baahiyahaaga.

**QALABKA (2A):
QIIMAYNTA
MEELAHA
URURKIINU
KUXOOGGAN
YAHAY,
HUFNAANTIISA
IYO MEELAHA
WANAAJINTA
U DIHIN**

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

1. Waa maxay muraadka kowaad ee ururkan laga leeyahay? Ama haddii si cad loo yidhaado, muxuu ururku u jiraa?

2. Sideed u tilmaami lahayd ururrukiina si ay maalgeliyayaashu u fahmaan wuxuu u jiro?

3. Tilmaanta aad ka bixisay ururkiina soo gaagaabi oo ka dhig weedho gaagaaban. Waa maxay fariinta furaha ah ee aad doonayso in lagu xusuusan karaa ayuu yahay? Fariintu waxay si gaara muhiim u tahay hadaad filaysay inaad ka hesho maalgelin ururro kale. Dadka qaarkii waxay tan ku sheegaan “*odhaada risaalada*”. Waa inay caddaata, koobin tahay, dardar gelin leedahay.

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

4. Maxaa markii hore ururkiina loo abuuray? Tanina waa su'aal fure u ah igmashada, sababta uu u jiro oo bilawgii laga yaabo inay ka duwanayd sida ay maanta tahay. Garashada halkaad ka timi ayaa qayb muhiim ah ka ah inaad g'oaansato meesha aad doonayso inaad gaadho mustaqbalka.

5. Haddii uu is beddeley muraadka uu ururku u jiray mudadii noloshiisa, maxaa keenay isbeddelkaas?

6. Waa maxay higsadka mustaqbalka ee ururkiinu? Haddii si kale loo dhigo, maxaad jeceshahay inuu ururkiinu qabanayo shan sanadood ka dib? toban sanadood ka dib?

QALABKA (2A): QIIMAYNTA MEELAHA URURKIINU KU XOOGGAN YAHAY, HUFNAANTIISA IYO MEELAHA WANAAJINTA U DIHIN

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

7. Waa maxay adeegyada uu ururkiinu hadda qabtaa ama waxa uu soo saaraa?

8. Sideed u tilmaami lahayd daawadayaashaad koowaad? Haddaynu si kale u dhigno, waa kuwee dadka adeegyada ama wax-soo-saarka ururkaaga isticmaalaa? Qidaaca gaarka ah su'aalahani waxay la xidhiidhaan macamiisha, suuqa iyo qaybta saamiyadda.

9. Waa maxay saddexda ugu muhiimsan ama faa'iidooyinka gaar ahaaneed ee ay helaan dadka isticmaala adeegyada ama wax-soo-saarka ururkiina?

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

10. Adeegyada ama wax soo saarka uu ururkiinu u gudbiyo macamiishiisa ama ka faa'iidaystayaashiisa ma u baahdaainay la isticmaalaan adeegyo kale oo uu soo saaro urur kale ama cid gaar ahi u gudbiso? Waxa laga yaabaa in aanay su'aashani caadi ahayn, lakiin isku xidhnaantaa oo kale ayaa raad weyn ku yeelan karta jiritaanka ururkiina mudada fog.

11. Siduu ururkiina uu ugu tiirsan yahay xidhiidhadaa? Sidaad u yarayn kartaa ku tiirsanaantaa mustaqbalka?

12. Adeegyada iyo waxsoosaarkaaga waa kuma ururka ama shirkadda ugu weyn ee kugula tartamaysa?

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

13. Maxa u sabab ah in ururkiina lagula beretamo adeegyada ama waxsoosaarka? Ma qiimahaa? Ma tayada adeegaa? Ma helitaan joogto ah iyo sahlalaan baa? Mise waa sababo kale? Ka fakir sabab kasta oo lagaaga guulaysan karo oo lagaaga dheereyn karo macamiishaada iy ka faaiidaystayaashaada .

NGO/CBO badan ayaa ka shaqeeya deegaan kooxaha bartilmaameedka u ahi ay doorashooyin aad u yar leeyihiin markay timaado helidda adeegyo ama waxsoosaar aan ahayn kuwa ururkiinu. Waxa laga yaabaa inaanu jirin tartan xooggani, hase ahaatee taas yaanay iska kaa hortaagin inaad waxa ugu wanaagsan samayso. Tayada iyo u-adeega macaamisha ayaa midho dhalka ururkiina waxtar weyn u yeelan kara.



14. Idinkoo suurtagalnimada xaaladda kor ku xusan ku salynaya, waa maxay waxyaalaha u waaweyn ee lagugu dhaleecayn ama cabaareyn karaa dhinaca adeegyada aad gubbiso iyo waxsoosaarkaaga?

15. Maxaad samayn kartaa si aad uga baxdo dhaliilaha iyo cabashooyinka?

Aan u leexano arimo kale oo saamayn ku yeelan kara jiritaanka ururkiina

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

16. Sidee baa u xayeysiisaa adeegyada iyo waxsoosaarka ururkiina? Ma kula tahay inay isku-dayadaasi wax-ku-ool yihiin?

17. Maxaa kuu qorshaysan in aad qabato kal dambe si aad u kordhiso wax-qabdnimada iyo wax-ku-oolnimada xayeysiiska ururkiina? Haddii ereyga xayeysiis ay kaaga dhadhamayso ganacsi u feker dhinaca xidhiidhka dadweynaha. Aduunyada NGO jiritaankeedu mudada dheer waxay ku tiirsan tahay ururro iyo dad kale:

- a) Garashada kaad tahay?
- b) Garashada waxaad qabato ee kaa sooca dadka ama ururrada aad isku shaqada tihiin?

18. Sidee baad u qorshaysaa inaad ku maal geliso hawlaha ururkiina ee hadda socda muddo u dhexaysa shan ilaa tobanka sanno ee soo socda?

Istaraatiyooyinka maalgelineed ee hadda jira ee inay sii socdaan aad jeceshahay waa kuwee? Kuwa cusub ee qorsheysani waa kuwee?

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

19. Tax ilaha dhaqaale ee hadda u jira ururkiina adigoo u kala heereynaya siday u kala muhiimsan yihiin, kadibna sheeg saddex sababood oo midna aanad doonayn inay sii wadaan maalgelinta isku- deyada ururkiina mustaqbalka? Tan waxa loo yaqaan inaanad saaxiibadaa u qaadaan inay jeebka kuugu jiraan.

20. Muxuu ururkiinu ay tahay inuu sameeyo si aanu u waayin ilahaas dhaqaale ee maal gelinta ugu mudan?

21. Waa kuwee noocayada bedeladda aad u baahan tahay inaad ku samayso shaqaalahaaga si uu ururkiinu u noqdo mid horumarsan oo guulaysta hadafkiisana gaadhikara muddo ku siman saddex sanadood?

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

22. Waa kuwee su'aalo kale oo aad u baahan tahay inaad naftaada weydiiso waqtigan hada ah, NGO ahaan si aad u kordhisin dihinnaanta inuu ururkiina ahaado mid ilaa xad sii waara. Haddii aad xusuusataan tayadan mudnaanta leh waxaynu kaga hadlayna boggaga u horeeya ee qaybta koowaad ee buuggan. Karaanka ururkiinu uu ku sii waari karaa wey ka madax banaan tahay saddexda arrimood ee isku xidhan ee kala ah:

- a) **Barnaamijka/horumarinta adeegga iyo qaybinta;**
- b) **Ururka iyo maareynta;**
- c) **Xooganaanta maaliyadeed iyo awooda waxqabad.**

Waqtiga iyo goobta ay doonto ha kugu qaadate waa inaad tuurta u ridato kaalinta fadhi adigoo weydiinaya oo ka jawaabaya su'aalaha la xidhiidha ururkiina ee aan wali la isweydiin gaar haan dhinaca waaritaanka ururkiina mustaqbalka fog.

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

QALABKA (2B): SOO JEEDIN QODOBADA GUUD EE QORSHE GANACSI

Ku salaysan Qiimaynta Urur: Qalabka 2A

Waxa soo socda soo jeedin qodobada guud ee u qoridda qorshe ganacsi ee NGO-ga; taasoo ku salaysan isqiimaynta urur ee aad hadda uun dhamyseen. Sidaan ku sheegnay hordhaca weydiinaha isqiimaynta, qodobada guud maaha muqadas. Xor baad u tahay inaad bedesho, wax ku darto, ama aad qaar tirtirto iyo wixii kale ee aad doonto.

Talo safar oo gaaban: Qaar ka mid mawadiicda ku qoran tasmada ee lagu soo bandhigay qodobada guud ee buugga kan ku xiga, ayaa laga yaabaa inaad hore u maqasheen. Ereyada ay ka mid yihiin suuq, xayeysiin, Xogta macaamiisha, iyo istaraatiijiyada ka bixiddu waxay inta badan la xidhiidhaan shirkadaha ama hay'adaha macaash doonka ah. Hase yeeshee, waa fikrado muhiima oo tixgelintooda leh markaad dadka u gudbinayso war ku sabsan ganacsigaagu wuxuu yahay. Wax dhici karta in dadka aad qorshahaaga ganacsi u gudbinaysaa inay yihiin maareeyayaal fulineed. Inaad afkooda kula hadashaa waa faa'iido.



Qodobo Tababare: Waxa suurtagal ah inaad dareentay in layliyadan maareynta intooda badani ay u qaabaysan yihiin goob aqoon is weydaarsi. Waxaannu kuu soo jeedinaynaa inaad u qaabayso si la mida sidaanu ku soo jeedinay ku shaqaynta qalabka (I) ee weydiimaha qiimaynta maareynta maaliyada. Inkasta oo aanay ka-qayb-galayaashu u baahnayn inay aqoon-isweydaarsiga keensadaan dhukumanti faro badan si ay u qoraan qorshe ganacsi, waxay u bahan yihiin agab hor dhac ah haddii aad ka filayso inay adoo la jooga ay qoraan qorshaha. Waxa la arkaa inaad waxoogaa dhibaato ah kala kulanto xiisa gelinta ka-qayb-galayaasha u arka in ururradood ay tartan ku la jiraan ururkiina. Inagoo taa ka duuleyna, waxaad u baahan tahay inaad la kulanto xubno muhiima sida agaasimaha, shakhsiyaad shaqaalaha fure u ah iyo Gudidda Latalinta xubno ka mid ah, si aad uga hesho talo iyo xogta horumarinta qorshahooda ganacsi.

**QALABKA (2B):
SOO JEEDIN
QODOBADA
GUUD EE
QORSHE GANACSI**

(magac urukaaga)

QORSHE GANACSI

Waxa soo socdaa waa qodobo guud oo tilmaamaya waxyaalaha ka mid noqon kara qorshahaaga ganacsi, ee maaha foom la buuxinayo.

Koobidda Nuxurka

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

Higsadka iyo Risaaladda

- Xaaladda hadda jirta -----
- Higsadka iyo risaaladda -----
- Ahdaafta iyo ujeedooyinka -----

Dulmaridda Ururka

- Sifaha sharciyadiisa -----
- Gudidda Agaasimayaasha -----
- Kooxda maareynta -----
- Istaraatiijiyada gaashaan- buureed -----

Istaraatiijiyada, adeeg iyo wax-soo-saar

- Adeegyada iyo wax-soo-saarka ee amintan -----
- Cilmi baadhista iyo horumarinta-----
- Geynta iyo qaybinta adeegyada iyo wax-soo-saarka-----

Gorfaynta Suuqa

- Qeexidda ereyga suuqayn-----
- Xogta macaamiisha -----
- Tartanka-----
- Khataraha -----

Qorshaha suuqgeynta

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA

EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

- Istaraatijiyada iibinta -----
- Shabakada geynta -----
- Istaraatijiyada qiima goynta -----
- Xiiso-gelinta iyo xayeysiinta -----
- Xidhiidhka dadweynaha -----

Qorshaha Maaliyadeed

- Qaadashada (assumptions) -----
- Warbixino lacageedyada -----
- Baahidda raasalmaal -----
- Istaraatijiyada soo afjarida deymaha -----

Maalgelinaha furaha ah ee laga yaabo inaad u baahato inay bixiyaan adeeg ama wax-soo-saar, sideed u qorshaysaa la soo noqoshada maalgelinahaa? Hadaad damacdo inaad ka baxdo fidinta adeeg ama wax-soo-saar, istaraatijiyada aad uga baxaysaa maxay tahay?

Gebogebo

Dhukumentigga qorshahaaga taageeraya

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

QALABKA 3: MUHIIMNIMADA REKODHADA IYO WARBIXINHA LACAGEED IYO SAAMAYNTOODA

Ujeedada waxbarashada: Waa inay kordhiso aqoonta iyo xirfadaha ka-qayb-galayaasha ee ah inay hindisaan habab si wax ku ool ah oo loogu adeegsado xafidida rikoodhada maaliyadeed.

Waqtiga loo baahan yahay: waa saddex saacadood

HAB SOCODKA

Layligan tababareed waxa loo adeegsan karaa curinta aqoon-is-weydaarsi ku saabsan hababka iyo habraacyada maareynta maaliyada, mar haddii ay liishaameyso sababaha rikoodhada maaliyadeed ay muhiimka u yihiin, marka laga tago xafidida dhaqdhaqaaqa lacagta ee ku kooban lacagta u soo hoyata iyo ta baxda ururka.

1. Madasha ku bilaw dood oo loo dhan yahay, ama layli hab socod kooxeed leh, oo caddeeya sababaha ay rikoodhada lacagtu muhiim ugu yihiin NGO iyo CBO, siday doonto ha yaraadaane. Waxa kale oo aad u abbabuli kartaa layli koox tiro yar oo ku salaysan habraaca aad rumaysan tahay inuu ugu wax ku oolsan yahay kooxda aad la shaqaynayso.
2. Isku dubarid fikradaha aad ka heshay qodobka koowaad. Taas waxa ka mid noqon kara isku day aad ku dhisayso shuruudo ama dood kooxeed hagaan oo lagu go'aansanayo qaybaha ama u adeegsiga wararka dabagalka hawlaha barashada.
3. Markaad isku dubariddo sababaha xafidida rikoodhada maaliyada sii waraaqaha shaqada ee qiimaynta iyo qorshaynta ee wax-ku-oolnimada rikoodhada aaliyada. Ka codso Ka-qayb-gale kasta ama koox mid ka badani haddii ay urur ka wada socoto; inay dhameeyaan warqadda shaqada ee qiimaynta iyo qorshaynta. u qabo inay soddon daqiiqo ku qabtaan hawlaha ku yaal warqadda shaqada.
4. Ka-qayb-galayaasha kulmi oo qaarkood ka codso inay ka warbixiyaan waxay ka barteen xafididida rikoodhada maaliyadeed iyo waxay qorshaynayaan in wax ka bedelaan siyaabihii hore, ee ay keeneen natiijooyinka layliga qorshaynta.

**QALABKA3:
MUHIIMNIMADA
REKODHADA IYO
WARBIXINHA
LACAGEED IYO
SAAMAYNTOODA**

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

QALABKA 3A: RIKOODHKA MAALIYADDU QIIMEYSAY WAX- KU-OOLNIMADIISA IYO WARQADA QORSHEYNTA

Maareynta NGO-yada iyo CBO-yada waxay noqon kartaa wax aad u fudud marka la haysto war haboon iyo xog lagu kalsoonaan karo oo ku saleysan ee ururkiisa oo joogto ah, wararka lacageed kuma eka oo keliya lacag ururka ka dabooli karta kharashkii u dambeeyey ee la galey inay Baanka taalo, inkastoo aannu aqoonsanahay lagamamaarmaanimada xog la taaban karo qaybta hore ee warqadan shaqo waxay soo bandhigtaa siyaabo dhawr ah oo ay maareeyayaashu u adeegsadaan xogta lacageed, su'aalahaas oo aan ka codsaney inaad qiimeyso wax-ku-oolnimada rikoodhada lacageed ee ay muujinayaan wararkan gaar ahaaneed qaybta labaad ee warqadda shaqada waxa loo hindisay inay kaa caawiso sidaas ugu fekeri lahayd qorshe kor u qaadida xafidaada rikoodhada lacageed weedh kastaa waxay leedahay toddobada heer qiimeyneed, inkastoo darafyada dhexe uun la cadeeyey sida:- 1 = maya weligeed 5 = ilaa xad, 7 = 5 dhameystiran, haka waaban inaad goobaabto lambarada kale, si aad u hesho qiimeyn la hubo dhinaca aragtidooda ku saabsan wax ku oolnimada rekoodhada lacageed.

**QALABKA 3A:
RIKOODHKA
MAALIYADDU
QIIMEYSAY
WAX-KU-
OOLNIMADIISA
IYO WARQADA
QORSHEYNTA**

1. Waan sameyn karaa go'aamo hawgal maalmeed caqligal ah oo ku dhisan rekoodhada lacageed ee maalintaa la joogo.

Maya waligeey			Ilaa xad		Si dhameystiran	
1	2	3	4	5	6	7

2. Waan u adeegsan karaa rikoodhada lacageed kor u qaadida ururkayaga dadka iyo ururrada kale ee daneynaya dhexdooda.

Maya waligeey			Ilaa xad		Si dhameystiran	
1	2	3	4	5	6	7

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

3. Waan adeegsan karaa rikoodhadayada lacageed si aan u soo bandhigo waxqabadkayaga lacageed markaannu dooneyno maalgelin ururka dibediisa ah sida siismooyin (Group) iyo qandaraasyo.

1	2	3	4	5	6	7

4. Waxaan uga soo bixi karaa shuruudaha si waafaqsan sharciyada lacageed ee ururrada kale si buuxda oo ay raali ku noqon karaan xagga shuruudaha waqtiga iyo wararka dhammeysiran.

1	2	3	4	5	6	7

5. Rikoodhadda sanado hore iyo imika waa lagama maarmaan, marka la dejinayo qorshayaal mudada dheer iyo diyaarinta miisaaniyada sanadeed.

Maya waligeey

Ilaa xad

Si dhameystiran

1	2	3	4	5	6	7

Isugee dhibcaha aad heshay, wadartoodana ku qoran meesha soo socota ee banaan. Dhibcaha la heli karo waxa ugu badani waa 35 wadar kasta oo ka yar 30 dhibcood waxay tilmaan u tahay baahida ay tahay inaad kordhisaan awoodiina xafidida rikoodhkiina lacageed.

Si aynnu layligan u dhameyno, qaado dhibcaha aad hesheen ee u yar ka dibna go'aamiya hadalka aad dooneysaan inaad gaadhaan marka eegayo baahidan maareyneed ee gaarka ah. Markaad dejisaan ahdaafta, qor saddexdaa hawlood oo adiga iyo shaqaalahaagu aad qaban kartaan soddonka cisho ee soo socda, oo aad kor ugu qaadaysaan waxqabadnimada xafidida rekoodhsiinta lacageed si cadna u sheeg cidda u baahan inay qabato maxay oo ku qabanayaan hawlahaan si waxqabad iyo wax ku oolnimo leh.

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

Hadaf

Hawsha 1aad

Hawsha 2aad

Hawshan Ku Celi Adigoo Qaadanaya Dhibicda Ay Midi Ka Hooseysay.

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

Hadaf:

Hawsha 1aad:

Hawsha 2aad:

Hawsha 3aad:

QALAB 4: DIYAARINTA MIISAANIYADDA SANADKA

Ujeeddada waxqabasho; In la kordhiyo aqoonta iyo xirfadahan ka qeybgalayaasha ee diyaarinta miisaaniyadda sanadka.

Waqti loo baahan yahay in ku dhow 3 saacadood

Hab socodka

Layligan muraadka laga leeyahay waa inuu maareeyayaasha NGO/CBO ka caawiyo siday u eegi lahaayeen hab socodka meesaaniyadooda sanadkan iyo siyaasadaba ay u tixgalin lahaayeen wanaajinteeda, sida ay layliyada buuggani u badan yihiin, waxa lagama maarmaan ah in la tixgaliyo koox macaamiisha idiin ah, si aad ogaataan ilaa heerka ay idiinku fur-furan yihiin inay dib u eegidda habraacyada lacagta la wadaagaan maareeyayaal laga yaabo inay tartan ugu wada jiraan maalgalino.

Iyada oo aynu ognahay mudnaanta baahiyaha ka qaybqaatayaashaadu eegaan, waxaannu dhiiri gelineyna inaad wixii isbedel ku sameyn karto sida loo hindisay tababarka ee kugu caawinaya inaad ku guuleysato u gudbinta tababarka macaamiishooda.

1. Kulanka ku fur dood layli ah oo kaqaybgalayaasha ka caawisa 'Diyaarinta Hawlaha soo raaca, waxaannu soo jeedineynaa su'aal doodeeda soo socota habraacyada. Waa maxay qaybaha habraacyada miisaaniyada kuugu adag qof ahaan?

Markey aaraa' dooda dhameeyaan, waxa suuragal ah inaad jecleysato inaad kula heeraysato heerar ku saleysan waxa ay ka qaybgalayaashu soo jeedinayaan, tan ku xigsii dood furan oo ku saabsan waxa laga qaban karo si loo furdaamiyo qaybaha kuugu adag.

2. Hel Ka qaybgalayaasha adiga u eegaya si qof ahaaneed ama kooxo ku wada socda isla urur ha ku qaadaan 30 daqiiqo sida ay u diyaarinayaan miisaaniyada sanadka sii foomka buugga soo socda ama ku yaala ama foom aad adigu hindistey. Haddii aad go'aansato inaad siiso foomka diyaarna u noqoto siyaabo ay isticmaalaan ururka adeegsada habsocodyo qalafsan, waxa lagama-maarmaan ah inaad siiso qaab ay u qoran warkan, sharax gaaban ka sii hawlaha, hana ogaadaan inaad diyaar u tahay wixii su'aalo ah ee ay hayaan.
3. Dib u kulmi ka qaybgalayaasha oo fuli dood aad u hageyso kuna saleysan cutubka labaad cutubkan oo ah mid ay ka buuxaan figrado NGO-yada iyo CBO-yada ka caawin kara, siday isugu tababari lahaayeen hababka lacageed ee u fududayn kara inaad noqotaan kuwa sii jiri kara oo xisaabtoodu sharaf tahay, liishaanka saar hab socodka guud intaad dooda ku jirtaan adigoo lixda qodob talaabo faah-faahina ka siinaya.
4. Dooda aad hageyso raaci dhowr ka qaybgalayaasha ah oo ka hadlaan waxyaalaha ay iskaga mid yihiin iyo kuwa ay ku kala duwan yihiin dhaqan gelinta miisaaniyadooda hadda iyo aragtiyaha buuggan lagu soo bandhigayey.

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

5. Ka codso ka qaybgalayaasha inay laba-laba u shaqeeyaan si uu midba mid u taageero hadduu u baahdo inkastoo shaqada inteeda badan lagu qabanayo kali ahaan ama kooxo ururka kawada socda. Hawsha waa inay dib u eegaan habsocodka miisaaniyadooda waqtigan oo ku saleysan layliyadii ay hore uga diyaariyaan qorshe hawleed ku saabsan isbedeladda ay lee tahay in lagu sameeyo habsocodka si ay u noqdaan kuwo waxqabad iyo wax-ku-oolnimo leh waqtiga ay hawshan ku qabanayaan waa saacad.
6. Ka qaybgalayaasha dib u kulmi oo ka codso inay wadaagaan isbedeladda ay qorsheynayaan oo ku saleysan waxay barten.

QALAB 4:
DIYAARINTA
MIISAANIYADDA
SANADKA

QALABKA 4A: HABSOCODKA MIISAANIYADDA URURKAYAGA EE HADDA

Hawlaha

Adigoo isticmaalaya qaabka soo socda, qor talaabooyinka habsocodka miisaaniyadda sanadka ee ururkiina laga bilaabo marka aad go'aansataan inaad bilowdaan ilaa marka la ansixiyo, haddii uu ururkiinu leeyahay habraac ansixineed, ama taariikhda ay miisaaniyadda cusub ay falgeleyso, ku tax tiirka kowaad (Column) Taariikhaha ay hawsha tiirka labaad (Column) ku taal ay bilaabaneyso iyo markey dhamaaneyso. Tiirka labaad (Column) hawlaha laga qabanayo caddee. Tiirka saddexaadna ku sheeg cida masuulka ka ah. Tiirka (Column) ugu dambeeyana ku qor (?). Haddii sharci ama siyaasadda ururka u ogoshahey talaabadan in la qaato.

Taariikhda bilowga & damaadka	Hawsha la qabanayo	Yaa masuul ka ah	Ma igman tahay

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

QALABKA 5: DIYAARINTA HABSOCODKA KAASHKA MIISAANIYADDA

Ujeeddada barashada: si kor loogu qaado aqoonta iyo xirfadaha ka qeybgalayaasha ee diyaarinta dhinaca habraaca kaashka miisaaniyadaha.

Wakhtiga loo baahan yahay: ilaa laba saacadood

Habsocoddka

Habraaca kaashka miisaaniyadda waa qalab aad muhiim u ugu ah NGS's iyo CBO's. Waxaa loo qaabeeyey inay maareeyayaasha ka caawiso inay ogaadaan halka ay marayso cadadka lacageed ee ay u haystaan kharash iyo dakhli bilkasta. Siloo qabto hab tababar xirfadeed ee hawshani, tani waxay ku keeni kartaa hadii ka qaybgalayaashaadu ka cagajiidaan inay u cadeeyaan kuwa kale xaaladooda maaliyadeed ee qodobaysan wakhtigii loogu talagalay. Si kastaba ha ahaatee, waxaa haboon iskuday, halkana waxaa lagu soo qadimay laba arimood.

Doorashada 1. qaado tusaalaha sookoobida miisaaniyad sannadeedka ah ee habraaca kaashka ee lagu soo bandhigay Cutubka 4:

Habraaca kaashka ee miisaaniyadda iyo harumarinta ee salka u ah layliga lagu tusaaleeyey iyo wax aad ugu eeg NGO's ama CBO's dibna loogu soo bandhigay aqoon-is-waydaarsigii salka uu u yahay qalabadaasi.

Haddii aanad aqoon u lahayn habsocodka kaashka miisaaniyada, waxaanu kuu soo jeedinaynaa inaad waqti yar dulmarto cutubka 4aad.

Markaad sharax gaaban ka bixiso dhaqdhaqaaqa kaashka miisaaniyadu wuxuu yahay iyo sida loo adeegsado marka lagu maareynayo lacagta kaashka ah ee urur leeyahay, ka codso ka qaybgalayaasha inay u qaybsamaan kooxo ah 3-4 qof. Sii hal bog oo ah ta dhaqdhaqaaqa kaashka NGO oo bil bil ah oo ku salaysan tusaalaha Cutubka sadexaad oo matalaya gobolkiina.

Hawshooda koowaad waa inay go'aamiyaan inta dheeraanaysa ama dhinmaysa dhaqdhaqaaqa kaashka ay haystaan oo bil bil lagu soo koobay iyo inta aad soo ururriso 12ka bilood. Hawsha labaad waa inaad go'aamiso istiraatiijiyada maalgashi maaliyadeed oo ku salaysan dhaqdhaqaaqa mudo 12 bilood. Sii ilaa 20 daqiqo inay hawlahaan ku dhameeyaan. Kulmi kooxaha oo ka codso in hawlaha koox waliba ka warbixiso. Waxaad u baahan kartaa inaad jaantus u qaybsan dhaqdhaqaaqa 12ka bilood adigoo isticmaalaya warqadweyn oo cad, si koox waliba ugu qorto isuna barbar dhigaan natijoooyinkooda. Layliga ku soo gabogabee dood guud oo ko n miisaaniyad loo sameeyo uga jawaab. obaysa siyaabaha ay wax u qabteen, wixii su'aalo ee ay kaa weydiiyaanna habsocodka

Doorashada 2: Tani waa doorashadii labaad oo si kale loo dhigay, hase ahaatee tirooyinkii dhabta ahaa ee rikoodhaddo 12 bilood laga soo xigtay, ka codso inay la yimaadaan rikoodhada dakhliyada iyo kharshyada, ka dibna hubina lagu sameeyo in qof waliba ama koox

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

ururka socotaaba inay qaa'imad u sameeyaan dhaqdhaqaaqa kaashkooda 12kaa bilood. Doorashadan labaad waa in ka qaybgale ama koox kastaaba ay dejiso qorshe maalgashi oo ay ku salaysan lacagta aan dhaqdhaqaaqin mudada ay dhukumantina ka sameeyaan. Waayo-aragnimadan habsocod u samee adigoo kaashanaya kharashyadaada iyo waayo-aragnimadaada.

QALABKA 5: DIYAARINTA HABSOCODKA KAASHKA MIISAANIYADDA



Tani waxay noqon kartaa layli ka qayb-galayaasha aanay ku degdegin inay ku qabtaan hab kooxeed. Adeegso aqoontaada sidaad u wejihi lahayd istiraatiijiyadan maaraynta lacagta ee ku salaysan waayo-aragnimadaada la shaqaynta ka qayb-galayaashan xaalad la mida waxbarashada dhacdadan.

QALABKA 6: TABABARKA MAAMULKA LACAGTA.

Ujeedada barashada: in la go'aamiyo baahiyaha tababarida maamulka lacagta ee kooxda uu ururkiina ka kooban yahay.

Wakhtiga loo baahan yahay:- wuxuu ku xidhan yahay sidaad u qorsheeyso habsocodka hoos ku sharaxan.

Habsocodka

Cutubka 4aad ayaa si balaadhan u soo bandhigay mawaadiida iyo dareemo ku saabsan maamulka lacagta, ee la kulmi kara maareeyayaasha NGOyo iyo CBOyo badan. Tusaale ahaan, cutubka 4aad waxa ka mid ah doodo ku saabsan:- ururinta dakhliga maareynta bixinta qiimaha adeegyada joogtada ah, kontaroolada guddaha, habka kaydinta alaabada agab iyo qalabka, fikrado soo iibsasho, sida loo maamulo hawlaha makhaasiinka, iyo dhawr fikradood oo ku saabsan hakinta qiimaha. Markaynu eegno inta ay le'eg tahay baahsanaanta mawaadiicda dooda ee maamulka lacagta, waxaanu garanay inaanu ku darin hindisayaal tababaro gaar ah tixgelintaada awgeed. Taas waxaanu door bidnay inaanu ku soo jeedino inaad diraasad ku samayso baahiyaha kooxaha bartilmaameedka idiin ah, iyo waxyaalaha maamulka lacagta ee ay xiisaynayaan adigoo isticmaalaya weydiinaha soo socda ama kuwo isaga ku salaysan aqoontaada ururrada aad u shaqayso.

Hadaad go'aansato inaad isticmaasho weydiinaha soo socda ama mid la mida waxaad u baahan doontaa inaad isu diyaariso inaad raaciso guudmar xaga tababarida ah. Kuwa soo socdaa waa soojeedimo qorshaynta fulinta tababarka.

- Waxa suuragal ah inaad u baahato khabiir xaga maamulka ah ka codsato inuu kaa caawiyo qorshaynta iyo fulinta tababar maamul lacageeda.
- Haddii aad go'aansato inaad weydiinaha isticmaasho, adigoo doonaya inaad sawir ka hesho baahiyaha kooxahaaga NGO/CBO-yada ah.
- Dabagal ku samee waxalaale wixii qoraal ah ee diraasada baahiyaha, adigoo xidhiidh qof ahaaneed la yeelanaya dadka ka qayb-galayaasha tababarka ka mida oo ay tahay inay bartaan in badan si aad u ogaato baahiyahooda gaar ahaaneed.
- Deji layliyo waxbarasho gacan ka qabasho ah oo ku salaysan aqoontaada saaxada ay NGO/CBO ka hawlgalaan iyo xaqiiqada ay matalaan, hadaad go'aansato mawduuca soo iibsiga, tusmee qalab ay NGO/CBOyadu badidoodu u baahan karaan, ka dibna ka qaybgalayaashu ha diyaariyaan shuruudaha qandaraas iyo dhukumentiga kale ee loo baahan karo inay ka dhigaan qandaraaska mid tartan geli kara. Koobiyo ka samee buugga iyo qoraalada kale ee laga heli karo noocyada qalabakan oo meelo kala duwan lagu sameeyey si ay ka qaybgalayaashu uga bartaan sida loo qorsheeyo shuruudaha qandaraasyadda adoon codsina takoorneyn.
- Abuur jawi barasho oo ay ka qaybgalayaashaadu wadaagi karaan waayo-aragnimadooda oo midba kan kale wax ka barto.
- Tixgeli dareemada ay ka qaybgalayaashu ay ka qabi karaan wadaaga wararka iyo fikradaha cidhiidhi gelin kara ee ku saabsan xaalada iyo hawlgalkooda ama dareensiin kara inay dhaawici karaan xidhiidhkooda la tartanka NGO/CBOyo kale.
- Fiiri gaara sii dhinaashaha gaar u tababarida adigoo la tashanaya NGO kasta ee u baahan gacansiin hase ahaatee diidan inay ka qayb galaan tababar ay ka qaybgeliyaan wakiilo ka socda ururro kale.

**QALABKA 6:
TABABARKA
MAAMULKA
LACAGTA.**

**DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED**

QALABKA 6A:

TUSAALE WEYDIINO DARAASADEEDKA

Baahiyaha xaga tababarka maamulka lacagta ee NGO/CBO

Waxaa soo socdaa waa liis hawlaha maamulka lacagta ay NGO/CBO badani dhibaato kala kulmaan inay si wax ku ool ah u maareeyaan sababuhu waxay doonaan ha ahaadaane. Si aan isugu deyno in adeegyadu wax u taraan baahiyahaaga adiga oo ah maareeye NGO, waxaan jeclaan lahayn inaad ka jawaabto weydiinaha soo socda ee ku saabsan baahiyaha ururkaaga wakhtigan ee tababarka maareynta lacagta. Haddii hawl gaara oo aan khuseyn xaaladaada jirto, kuna calaamadi inta ay khuseyso (ikh) NA.

No	Fursada tababar	Waan jecelahay	Ma jecli	Ima khuseyso
1.	Siyaasadaha iyo hab-raacyada qaansheegashada adeegyada			
2.	Siyaasada iyo hab-raaca qabashada lacagaha			
3.	Isticmaal buuggaagta lacag-qabashda (receipt)			
4.	Hindisida iyo fulinta kaantaroolada gudaha			
5.	Hindisida iyo fulinta habka kaydka			
6.	Sida loo helo qiimaha ugu wanaagsan markaad soo iibsanayso badeecado ama adeegyo			
7.	Sidaad u diyaarinayso shuruudaha qandaraaska			
8.	Sidaad kor ugu qaadi karto hawgalada makhaasiinkaaga			
9.	Sida loo hakiyo kharashka			
10.	Baahiyo tababar oo kale (fadlan tax)			

A) Farsadaha tababar ee aad u muujisay inaad jeceshahay waxaad qortaa saddexda mudnaanta u sareysa kuu leh, ka dibna si gaar ah u tilmaan aqoonta iyo xirfadaha waxtar weyn kaa caawin kara inaad hagaajiso maareynta hawlgalkan:-

- **Mudnaanta 1aad: -**
Aqoontaada iyo xirfadaha gaar ahaaneed

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

- **Mudnaanta 2aad:-**
Aqoonta iyo xirfadaha gaar ahaaneed:-

- **Mudnaanta 3aad:**
Aqoontaada iyo xirfadaha gaar ahaaneed:-

- **Fadlan sheeg wixii war ah ee waxtar u yeelan kara qorsheynta jawaab baahiyahaas tababar.**

Magaca:

Ururka:

Habka loola xidhiidhayo (telefoon, ciwaan, xidhiidho kale).

QALABKA 7:

MAAREYNTA HABSOCODKA HANTIDHAWRIDA



Badiba hantidhawrka waxa shuruud ka dhigga hay'adaha sharci marinta ee dawlada, waxa kale oo uu shuruud u yahay helida iyo isticmaalka maalgashiga dibada. In kastoo aanay NGO/CBO khasab ku ahayn inay hantidhawraan buuggaagtooda iyagoo adeegsanaya hantidhawre ururka dibada ka ah sannad walba ama dhammaadka barjaamij, haddana waxay waxtar u leedahay maareynta ay caado u noqonaysaa. Qalabkan oo ah kii u dambeeyey waxaa loo hindisay inuu maareeyayaasha NGO/CBO ku baraarujiyo inay ka faa'iidaystaan hantidhawrida xiliga ah iyo inuu ka caawiyo inay ka fakaraan siyaasadaha kale duwan ee ay tahay inay tixgeliyaan markay isu diyaarinayaan hantidhawrid si mustaqbalka ka faa'iideysiga sida ugu weyn hantidhawryada mudaalaha ah ee maareynta xilalkaaga kormeerida lacagta, waxay ku bilaabmataa siyaasadaha urur u yaal ee hantidhawrka gacan ku siinaysa inuu fuliyo kaalintiisa. Hantidhawrayaasha waxqabad lihi waxay leeyihiin laba xil:-

- 1) Inay hubiyaan in lacagta si xilkaasimo ku jirto loo maareynayo, taasoo micnaheedu yahay, inaan la xadeynin, la lunsanaynin, inaan si qaldan loo maareynaynin iyo waxyaalaha kale ee aynu is leenahay hantidhawrayaasha ayey tahay inay eegaan si ay inooga badbaadiyaan xabsiga iyo.
- 2) Inay hubiyaan in lacagta aad u maamuleyso si wax ku ool ah oo hufan adigoo maskaxda ku haya in ururkeenu sii jiro muddada dheer. (*eeg cutubka 1aad si aad u xusuusato fikradaha muhiimka ah*).

Ujeeddada: In la kordhiyo aqoonta ka faa'iideysiga, dejinta iyo ku camal falka siyaasada taagiri doona in hantidhawrayaashu ay dhameystiraan dib u eegida mudaleyda ah ee lacagta ee ay ka mid yihiin:-

- a) Xisaabtanka lacageed sida helida si-xun u isticmaalkeeda
- b) Habka maareynta lacagta kobcina kara sii-jiritaanka.

Wakhtiga: muddo u dhaxeysa 2 - 3 saacadood

Habsocodka

- 1) Fuli dood ku saabsan faa'iidooyinka hantidhawrida lacagta. Ku salee arimaha ku yaal Cutubka 6aad qaybtiisa 1aad ee tilmaamaha, ama weydii xisaabiye sharciyeysan ama qof kale oo khibrad u leh xirfadaha hantidhawrka inuu bandhigo arimahan absocodka hantidhawrka dhinaca waafaqsanaanta iyo aragtiyaha hagaajinta maareynta. Tan ku xidh dood ku saabsan noocyada siyaasadaha loo baahan yahay inay taageeraan labadan masuuliyadood ee hantidhawrida. Hantidhawrida wax ku oolka ahi waa inay lacagta iyo maaraynta guud hantidhawrtaa siday ula xidhiidhaan ururka caafimaadkiisa dhaqaale.
- 2) Ka codso ka qayb-gale kastaa inuu dhameeyo weydiimaha ku saabsan siyaasadaha lacagta, adigoo xusuusinaya inay siyaasadaasi yihiin aasaaska hindisaha habraacyada hantidhawrka wax ku oolka ah iyo wanaajinta aaminimada ay deeq bixiyayaasha ku qabaan ururkiina. Marka qofkastoo ka mid ah ka qaybgalayaasha uu dhameeyo waydiimaha, ka

QALABKA 7:
M A A R E Y N T A
H A B S O C O D K A
HANTIDHAWRIDA

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

codso inay ku biiraan mid ama laba kale si ay uga doodaan jawaabahooda gaar ahaaneed. Siyaasado sooc ah oo u baahan eegmo gaara haddii ay dhacdo in urur ay ka joogaan qof wax ka badani, ka codso inay koox ahaan u shaqeeyaan.

- 3) Soddon daqiiqo ka dib fadhi isugu yeedh ka qaybgalayaasha oo ka codso inay tacliqo ka bixiyaan iyagoo doodo kooxeedyo yar yar u qaabaysan.

WEYDIINAHA IS-QIIMEYNTA EE SIYAASADAH MAALIYADEED IYO KORMEERIDDA LACAGAHA.

Waxa soo socda taxane siyaasadaha maareynta lacagta oo hagaajin kara wax qabadka ururkiina, una diyaarin kara ururkiina iyo shaqaalahaba inay hantidhawrayaasha iyo ciddii kale dib u eegta warbixinahaaga lacageed iyo dhaqdhaqaaqa.

Marka aad weedho gaagaaban ku tilmaantid siyaasad kasta, afar jawaabood ayuun baa suurtoagal ah:-

- 1 **Haa wanaagsan:** Siyaasaddi wey jirtaa si wanaagsana wey u shaqeynaysaa.
- 2 **Haa laakiin:** Siyaasadi wey jirtaa, laakiin waxqabad male, wax kastaaba sabab ha ahaadeene.
- 3 **Maya:** Siyaasad noocan ahi ma jirto
- 4 **Eegid bay u baahan tahay:** Waxa u baahan jawaabta haa/laakiin ama maya ah, taasoo tilmaamaysa in talaabo laga qaado.

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

	Odhaahda siyaasada siday ugu xidhan tahay ururka	Haa/ wanaag	Haa/ laakiin	Maya	U baahan dib-u-
1	Waxaanu leenahay oo aanu hirgelinaa xisaabtan waafaqsan mabaadiida iyo hawlgalada la aqoonsaday				
2	Si joogto ah ayaanu u gorfaynaa qiimaha adeeg kasta				
3	Waxaanu sanad walba fulinaa baadhis oo uu xisaabiye dibada uruka ka ahi, ama shirkad xisaabineed fuliso				
4	Hantidhawridu waxay koobtaa waafaqsanaanta iyo go'aaminta hababka iyo hagaajinta habraacyada				
5	Waanu leenahay habka kontoroolka gudaha				
6	Habka waxa dib loo eegaa sannadkiiba mar si loo ogaado waxqabadkeeda joogtada ah				
7	Waxaanu odoroosnaa kharashyada iyo dakhliyada ku talogalka saddexda sannadood in ay ugu yar tahay ka hor sannad walbana cusboonaysiina				
8	Waxaanu hindisnay tusayaal wax-soorsaar iyo waxqabad oo loo adeegsado diyaarinta miisaaniyad sanadeedka				
9	Miisaaniyadda sanad kasta ayaanu dib eegnaa				
10	3 dii biloodba waxaanu cusboonaysiinaa odorosyada dhakhliga anagoo curinayna qaadashooyinkayaga la xidhiidha dhaqdhaqaaqyada kharashka				
11	Waxaanu hirgelinaa dib u eegida lacagaha laga qaado ka faa'iidaystayaasha badeecadaha iyo adeegyada uu ururku bixiyo, si loo hubiyo inay dabooli karaan kharashka				
12	Lacagta meel kasta taala maalgashi ayaanu ku sameynaa intuu sharcigu og yahay				
13	Waxaanu hindisnay habraacyo xoog sareeya bad baadinta iyo kharash meel yaala maalgashigooda				
14	Waxaan dalabnaa qiima sheegyo baratan leh markaanu wax soo iibsanayno				
15	Waxaanu is waafajinaa alaabta soo hoyata iyo qaansheegyada				

Siyaasad kasta oo aad ku muujisay dib u eegida u baahan hoos ku sheeg waxa laga qaban karo, si siyaasada sida looga dhigayo mid jirta iyo sida loo fulinayo. Coddee cida qaadeysa masuuliyada in siyaasada la qaato iyo fulinteeda. Waxa kale oo aad codeysaa wakhti aad u qorsheysay talaabooyinka la qaadayo.

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

FOOMKA (D) CODSIGA MIISAANIYADA BARNAAMIJYADDA

Foom (D) codsi miisaaniyad barnaamij

Barnaamijka	Maalgashiyada (Funds)			Sannadka lacagta		
Tirsiga shayga	Madaxa xisaabta	Kalhore dhabta sannadka	Qiyasta sannadkan.....	Miisaaniyadda adeegyada jira sannadkan..	Isbedelka adeegyadaan.....	Miisaaniyadda sannadkan.....
	Adeegyada shaqaalaha					
	Isugeyn					
	Alaabta iyo qalabka					
	Isugeyn					
	Adeeyo & kharashyo					
	Isugeyn					
	Lacag hanti lagu hagaajinayo					
	Isugeyn					
	Wadar					
	Shaqaalaha la codsaday					

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

FOOM (F) TAAGEERADDA ISBEDELKA ADEEGA

Foom (F) Taageeradda isbedelka adeeg				
Barnaamijka..... maaliyadda..... sannad maaliyadeedka.....				
Si kooban oo qancin leh u sharax isbedelka adeega ee la soo jeediyey				
	Jagadda	Lambarka	Qiimaha bilaha & saacadaha	Mushaar Sannadeedka
	QIIMAHA BARNAAMIJKA			
	ADEEGYADA SHAQAALAHA			
	ALAAFTA IYO AGABKA			
	ADEEGYO IYO KHARASHYO KALE			
	LACAGTA HANTI LAGU HAGAAJINAYO			
	WADARTA	WADARTA	KU WAREEJINTA FOOM (D)	ISBEDELKA ADEEGYADA

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

GLOSSARY	
ENGLISH	SOMALI
1. Accountability	- Xisaabtan - Xilkaa Saaran yahay
2. Action plan	- Qorshe hawleed - Wax-qabad hawleed
3. Active Listening	- Dhegaysi feejigan - Dhegaysi Darban - Dhegaysi Mug leh
4. Alternative	- Kala Doorasho - Wax bedeli kara wax kale
5. Application	- Arji - Codsii - Adeegsi
6. Assessment	- Qiyaasid - Qiimayn
7. Authority	- Suldada - Awood xukun
8. Awareness	- Wacyi-galin - Ka war qab
9. Basic Education	- Wax-barasho Asaasi ah.
10. Beneficiary	- Dan ku Qabe - Ka faa'iidayste
11. Capacity Building	- Kobcin wax Qabad - Awood dhisid
12. Case Study	- Daraasad Xaaladeed
13. Check list	- Liis Hubineed
14. Civic	- Madani - La xiriira magaalo - Muwaadin
15. Collaboration	- Gacan siin - Wada shaqayn - Is Caawimid
16. Committee	- Guddi
17. Communicator	- Gaarsiiye - Isgaadhsiye
18. Community	- Beel - Jaaliyad

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

19. Community Development	- Horumarin Beeleed - Horumarin Jaaliyadeed
20. Concepts	- Figrado - Aragtiyo
21. Conceptual Hat Rack	- Figrada Metalaada Xilaalka
22. Conflict	- Is-qabad/Khilaaf - Iska hor imaad
23. Consensus	- Rayi la isku raacay - Aqbalaad figrad guud
24. Consequently	- Natiijo - Cawaaqib
25. Constituency	- Dagaan Doorasho
26. Co-operation	- Iskaashi
27. Council	- Wada shaqayn - Gole
28. Councillor	- Xil-dhibaan Degaan
29. Counter productive	- Xubin ka tirsan Gudiga degaanka - Maax Dumin - Lid ku ah
30. Criteria	- Cabirka wax lagu saleeyo - Qoddobbo wax lagu saleeyo
31. Critique	- Wax lagu Saleeyo
32. Decision Maker	- Goa'aamiye
33. Definition	- Qeexid
34. Delegation/Delegate	- Wefti - Ergo
35. Democracy	- Demoqraadiyad
36. Description	- Tilmaan - Sifo - Sharax
37. Dialogue	- Wada Hadal
38. Effective	- Wax ku ool - Sidi la rabay wax u tarid
39. Effective leadership	- Hogaaminta wax ku oolka ah
40. Efficiency	- Wax qabad fiican leh
41. Elected Leadership	- Hogaaminta la doortay
42. Empower/Empowerment	- Awood siin - Awood u fasaxid

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

43. Enabler/Enable	- Awood siin - Karti siin
44. Essay	- Qormo - Maqaal
45. Ethical	- Hab-dhaqan
46. Evaluation/Evaluate	- Qiimayn
47. Evaluation Survey	- Qiimayn Sahan - Baaritaan qiimayneed
48. Exercise	- Layli
49. Facilitator	- Fududeeye/Sahle
50. Feed back	- War Celin - Jawaab Celin
51. Financier	- Masuul Maaliyadeed.
52. Gender	- Jandar
53. Goal	- Hadaf - Gool
54. Good Governance	- Hab Xukun Wanaagsan - Hab Maamul
55. Government	- Xukuumad
56. Group Discussion	- Dood kooxeed
57. Guide	- Tilmaamid - Hage
58. Hand Book	- Tilmaan Bixiye - Tilmaame Bare
59. Human Resources	- Khayraadka Dadka
60. Human Settlement	- Degsiimooyinka Aadanaha - Degaamayn
61. Implementation	- Hirgalin - Fulin
62. Information	- Xog - Wargelin
63. Institution	- Haya'ad
64. Institution Builder	- Haya'ad Dhise
65. Institutionalise	- Haya'deeye
66. Instruction	- Amar - Wax barasho - Wax barid

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

67. Key Point	- Qoddobbo Muhiim ah. - Qoddobbo Ma Dhaafaan ah
68. Leadership Process	- Geedi socod Hoggaamineed
69. Learning	- Barasho - Wax Barasho - Tacliin Barasho
70. Learning Objective	- Ujeeddooyinka Barashada - Yoolka Barashada
71. Local Government/Authority	- Dawladda Hoose
72. Majority	- Aqlabiyad - Inta Badan
73. Management Process	- Geedi Socodka Maaraynta
74. Meeting	- Kulan - Shir
75. Minority	- Inta Yar - Laga tiro yar yahay
76. Minutes	- Hadal Qor - Hadal qoraal
77. Mission	- Ergo - Risaalo
78. Monitoring	- La socod - La saan qaad
79. Negotiation/Negotiator	- Wada Xaajood siiye - Wada Hadal siiye - Gorgoriye
80. Networking	- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya
81. Organization	- Urur
82. Overseer	- Korjooge
83. Overview	- Dulmar/Guud Mar
84. Participants	- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha
85. Perception	- Faham/Dhugmo/Garasho
86. Performance	- Waxqabad/Fulin Hawleed
87. Perspective	- Ka eegid wajio kala duwan
88. Policy	- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad
89. Policy Maker	- Siyaasad Dejiye
90. Power Broker	- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade
91. Presentation	- Soo Bandhigid/Qadimaad

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

92. Proactive	- Ka hor dhaaf/Qorshe Curiye/Qorshe raac
93. Process	- Geedi socod/Socodka
94. Questionnaire	- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah
95. Quorum	- Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo
96. Rational	- Maan-gal/Macquul
97. Reactive	- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug
98. Reference	- Tixraac/Raad raac
99. Reflection	- Ilays noqod/Humaag noqod
100. Resources	- Khayraad
101. Revenue	- Dakhli
102. Role play	- Door-jelid/Door ciyaarid
103. Session	- Fadhi/Kulan
104. Shared Vision	- Aragti wadaag
105. Simple Majority	- Aqlabiyad hal dheeri ah
106. Simulation	- Iska yeelid/U ekeysiiin
107. Slums	- Buul caws/Carshaan/Isku raran
108. Solution	- Furdaamin/Xal
109. Stakeholders	- Daneeyayaal
110. Strategic Plan	- Qorshe istaratijiyadeed
111. Strategy	- Istaratijiyad/Tab/xeelad
112. Summary	- Soo koobid/Khulaaso
113. Symptoms	- Astaamo/ Calaamado
114. Systematic	- Habaysan/Nidaamsan
115. Technique	- Farsamo/Xeelad
116. Training Design	- Jaanjooyada Tababarka/Naqshadeynta Tababarka
117. Training Material	- Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka
118. Training Need Assessment	- Qiyaasid baahida Tababarka/Qiimeynta Baahida Tababarka
119. Transparency	- Wax qaris laa'aan
120. Transparent	- Qof aan waxba qarinaynin.
121. Unanimous	- Loo dhan yahay/Gedigood
122. Vision	- Aragti fog/Aragti dheer
123. Warm up exercise	- Iskulaalayn/Qandhicin/Diiran
124. Workshop	- Aqoon Isweydaarsi
Priority two words	
125. Acknowledgment	- Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin
126. Administrative Fixes	- Adeegsi

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

127. Analysis	- Gorfeyn/Falanqeyn/Taxliil
128. Assignment	- Shaqo Mucayin ah
129. Assumption	- Maleyn/Si u qaadasho
130. Benchmark	- Bar qiyaaseed/Bartilmaameed
131. Challenges	- Caqabad/Loolan/Hardan
132. Collective	- Kooxeed/Urureed/Wadareed
133. Conceptual frame work	- Gadaan-fikradeed/Aasaas fik
134. Constructive	- Wax dhisid/Dhismo-gal
135. Conventional Wisdom	- Xikmad soo jireen ah
136. Corruption	- Musuq-maasuq/Laaluush.
137. Dilemma	- Laba daran mid dooro
138. Diversity	- Kala duwanaa/Kala gedisnaa
139. Encouraging	- Dhiiri-galin/Geesinimo galin
140. Fundamental	- Asal/Aasaasi
141. Identification	- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi
142. Individual Contribution.	- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri
143. Infrastructure	- Dhismo-hooseed.
144. Input	- Wax galin
145. Insight.	- Aragti Maskaxeed
146. Inspiration	- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid
147. Interaction	- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid
148. Judgement	- Xukun/Go'aan
149. Land Use Malaise	- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa
150. Multipurpose	- Ujeedo badan/Ujeedooyin kala du
151. Output	- Wax ka soo saarid
152. Potential Candidate	- Musharax dihin/Musharax iman kara
153. Pre-training	- Tababar horaad/Tababar hortiiis
154. Priority	- Mudnaan
155. Problem Solver	- Furdaamiye/Xaliye dhib
156. Proficiency	- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh
157. Public	- Guud
158. Public Sector	- Qaybta Guud
159. Public Service	- Adeeg guud.
160. Regulation	- Xeer Hoosaad.
161. Self Governance	- Isxukumid.
162. Self Introduction	- Is-sheegid/Is-tilmaamid
163. Self study	- Isbarid
164. Self Assessment	- Isqiyaasid/Isqiimeyn
165. Shrinking Resources	- Khayraadka sii yaranaya

DHISIDA AWOODDA NGO/CBODA
EE MAAMULKA IYO HORUMARINTA KHAYRAADKA MAALIYADDEED

166. Technical	- Farsamo/Farsamayn
167. Training needs	- Baahi tababar
Priority three Words	
168. Absolute Poverty	- Saboolnimo
169. Absolute	- Gebi-ahaan/Buuxda
170. Application Commitments	- Nidar-gal/Daba-qaad ballan
171. Bureaucracies	- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay
172. Caution	- Taxadar/Digniin
173. Density	- Cufnaan/Jirmiga shega
174. Environmental Degradation	- Hoos u dhac degaan/Hoos u dhac xaaladda degaanka
175. Equilibrium	- Dheeli-tir/Is-le'eg
176. Hawker	- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya
177. Implication	- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka
178. Jurisdiction.	- Haya'addaha Garsoorka
179. Legal Requirement.	- Baahida Sharciyeed
180. Legislation	- Xeer Degin
181. Legitimate	- Sharci ahaan/Qaanuun ahaan
182. Matchmaker	- Isku aadiye wax isku habboon
183. Misinterpretation	- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan
184. Off-spring	- Farac
185. Optimistic	- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg
186. Partnership	- Wadaag/Wada lahaansho
187. Pessimistic	- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg
188. Phenomena	- Ifafaalayaal
189. Professional	- Xirfadle/Xeel-dheeri
190. Recycle	- Sameyn celin/Dib u nacfi galin
191. Rules	- Qawaaniin/Xeer
192. Status Quo	- Xaalad taagan
193. Stimulation	- Xiiso galin/Fi-fircooni galin
194. To Wear Different Hats	- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa
195. Water Pollution	- Dikhaw Biyood/Wasakhaw Biyood/Dhiiq
196. Facilitator	- Fududeeye
197. Financier	- Masuul Maaliyadeed
198. Gender	- Jandar
199. Negotiator	- Wada hadal siiye
200. Overseer	- Korjooge
201. Policy Maker	- Siyaasad dejiye
202. Power Broker	- Awood wax ku Qabte
203. Institution Builder	- Haya'ad dhise
204. Leader	- Hogaamiye
205. Leadership	- Hogaamin

**UN-HABITAT
TRAINING AND CAPACITY BUILDING BRANCH (TCBB)
AND REGIONAL OFFICE FOR AFRICA AND THE ARAB STATES
(ROAAS)**

P.O.Box 30030 GPO Nairobi 00100, Kenya
Telephone: 254-20-623120; Fax: 254-20-624266/7
E-mail: infohabitat@unhabitat.org; Website: <http://www.unhabitat.org>

EUROPEAN COMMISSION